HESHIISKA WHO EE XAKAMEYNTA TUBAAKADA

HWXT
HESHIISKA WHO
EE XAKAMEYNTA
TUBAAKADA

HESHIISKA WHO EE XAKAMEYNTA TUBAAKADA

Maktabadda WHO Ee Diiwaangelinta Xogaha Daabacan.

Cahdiga WHO Ee Xakameynta Tubaakada

1.Tubaako – soosaaris iyo qeybin 2. Shirkadaha tubaakada – xeer 3. Wasaqda Qiiqa tubaakada – ka hortag iyo xakameyn 5. Heshiisyo

1. Ururka Caafimaadka Adduunka.

ISBN 978 924 1591010 (LC/NLM kala shaandheyn: HD 9130.6)

Ururka Caafimaadka Adduunka 2003, waxaa dib loo saxay oo la daabacay 2004, iyo 2005.

Xuquuqda oo dhammi wey dhowran tahay. Waxyaabaha uu daabaco Ururka Caafimaadka Adduunku waxaa laga heli karaa WHO Press, Ururka Caafimaadka Adduunka, Wadada Appia 20, 1211 Geneva 27, Switzerland (tel. +41 22 791 4857, email. bookorders@who.int). Codsiyada lagu dalbanayo oggolaansho dib loogu daabaco ama lagu turjumayo qoraallada Who- haddii laga ganacsanayo ama si kale loo qeybinayaba- waxaa lagu soo hagaajinayaa WHO Press, ee cinwaankeedu sare ku xusan yahay (fax: +41 22 791 4806, email: permissions@who.int)

Xulashooyinka la sameeyay iyo waxyaabaha lagu soo bandhigay qoraalkani sinnaba uga turjumayaan aragtida uu qabo Ururka Caafimaadka Adsuunka ee ku saabbsan xaalad sharci ee uu ku sugan yahay dal, dhul, magaalo ama aag ama maamulladooda, ama khuseeya wax ka beddelidda xadad ama xuduudahooda. Xariiqaha dhibcaha ah ee ka muuqda qariiradda kama turjumayaan xaqiiqaha xadeed ee saxda ah, kuwaasoo laga yaabo in aan weli heshiis laga gaarin.

Sheegidda shirkadaha qaarkood ama badeecadaha shirkadaha qaarkood macnaheedu ma aha in Ururka Caafimaadka Adduunku uu soo jeedinayo in badeecadahaas laga doorbido kuwa kale oo la nooca ah ee suuqa yaalla. Markii laga tago wixii la qalday ama laga booday, magacyada badeecadaha shirkadaha ganacsiga waxa laga billaabay xaraf weyn si qoraalka intiisa kale looga sooco.

Ururka Caafimaad Adduunku wuu qaaday dhammaan tallaabooyinkii suurta galka ahaa si loo xaqiijiyo xogta ku jirta qoraalkan. Si kastaba, qoraalkan waxaa la qeybinayaa iyadoo aan la bixineyn wax daammaanad ah oo cad ama dadban. Mas'uuliyadda fahamka iyo sida uu adeegsanayo qoraalku waxay saaran tahay aqristaha. Ururka Caafimaadka Adduunku sinnaba mas'uul ugama noqon doono wixii dhibaato ah ee ka dhasha adeegsiga qoraalkan.

Dukumiintigan waxaa daabacay Waaxda daabacaadda qoraallada ee WHO , Geneva, Switzerland.

Tusmada Buugga

Hordhac.

Cahdiga W.H.O ee xakameynta tubaakadu waa heshiidkii ugu horreeyay ee la gaaray iyadoo uu gacan ka geysanayo Ururka Caafimaadka Adduunku. Cahdiga WHO ee xakameynta tubaakadu waa heshiis ku fadhiya caddeymo rasmi ah oo lagu dammaanad qaadayo xaqa ay dadka oo dhammi u leeyihiin iney helaan heerka caafimaad ee ugu sarreeya. Cahdigan xakameynta tubaakadu wuxuu soo gudbinayaa isbedel ku dayasho mudan oo loo qaaday dhanka dejinta xeerar istaraatiijiyadeed oo lagula tacaalayo waxyaabaha maanka dooriya, si ka duwan heshiisyadii hore ee lagu xakameyn jiray tubaakada. Cahdiga cusub ee WHO wuxuu sheegayaa muhimadda ay leedahay in la helo istaraatiijiyad lagu dhimayo baahida loo qabo maandooriyayaasha iyo soo saaristoodaba.

Caqdiga WHO ee xakameynta tubaakada waxaa la dejiyay iyadoo laga jawaabayo dhibaatada ba'an ee tubaakado adduunyada ku hayso. Faafidda dhibaatada daroogada waxaa sii fududeynaya arrimo badan oo isku xiran oo qaarkood ay xaduudaha ka talowsan yihiin, oo ay ka mid yihiin xorriyadda ganacsiga iyo maalgashiga shisheeye ee tooska ah. Waxaa kaloo in tubaakadu si daran adduunyada ugu fiddo sababaya arrimaha ay ka mid yihiin isu furnaanta suuqyada ganacsi ee caalamka, xayeysiinta tubaakada ee dalalku isu gudbiyaan, dhiirigelinta iyo kaalmada ay helayaan iyo sigaarka iyo alaabada kale ee sida sharci darrada aha dunida isaga kala gooshaya.

Laga billaabo baaragaraafka ugu horreeya ee hordhaca ah, kaas oo sheegaya in "dhammaan qeybaha caqdiga saxiixay ay ka go'an tahay iney mudnaanta siiyaan xuquuqdooda ah in ay dhowraan caafimaadka guud ee dadweynaha", ilaa dhammaadka heshiiska, caqdiga WHO ee xakameynta tubaakadu wuxuu adduunyada oo dhan ka dammaanad qaadaya ka hortagga tubaakada, waana u tusaale ay raacaan.

Waxyaabaha aasaasiga ah ee lagu yareynayo dalabaadka tubaakadu

waxay ku ururs an yihiin qodobbada 6-14-ad ee cahdiga WHO Ee xakameynta Tubaakada.

Qaabab lagu yareynayo dalabaadka tubaakada, iyadoo la adeegsanayo ascaarta iy canshuurta, ama siyaabo aan ascaarta la xiriirin oo lagu dhimanayo dalabka (baahida) tubaakada, waxaan ka xusi karnaa:

- Ka hortagga in tubaakada lagu cabbo dadka dhexdiisa,
- Xeerar u sameynta waxyaabaha ku jiraya badeecada tubaakada ka sameysan
- Xeerar ka shifaya waxa tubaakadu ka suubsan tahay,
- galeynta iyo sumadeynta badeecadaha tubaakada,
- Tacliinta, warbaahinta, tababaridda iyo wacyigelinta dadka,
- Xayeysiinta tubaakada, dhiirrigelinta iyo wakiilnimada, iyo

- Habab kale oo lagu yareynayo dalabaadka tubaakada oo ku saabsan ku tiirsanaanteeda iyo joojinteedaba.

Arrimaha muhiimka ah ee lagu yareynayo soo saarista tubaakadu waxay ku qoran yihiin qodobbada 15-17-ad ee Caqdiga WHO Ee Xakameynta Tubaakada,
Ka ganacsiga sharci darrada ah ee waxyaabaha maanka dooriya;
In carruurta laga gado ama ay iibiyaan tubaakada iyo
In dadka lagu kaalmeeyo iney raadsadaan shaqooyinka kale oo dhaqaale ahaan looga maarmi karo maandooriyayaashii.
Arrinta kale oo muhiimka ah ee cahdiga ku jirta waxay tahay iney jiraan qodobbo tilmaamaya in la iskula xisaabtamayo jebinta axdigan. Qaabab lagu helayo iskaashi farsamo iyo mid cilmi, leyskuna dhaafsanayo xogta ayaa lagu qoray qodobbada 20-22-ad.

Cahdiga WHO Ee Xakameynta Tubaakada waxaa saxiixiisa laga furay magaalada geneva intii u dhaxeysay 16-kii ilaa 22-kii Juun sanadkii 2003, mar dabme ayaa haddana laga furay Xarunta Qaramada Midoobay ee Newyork, halkaas oo ah meesha heshiisku ku keydsan yahay, taariikhdu markey aheyd 30-kii Juun 2003 ilaa 29-kii Juun 2004. Heshiiska oo hadda saxiixiisa la xiray wuxuu heystaa 168 saxiixayaal oo uu ku jiray Midowga Yurub, taasoo heshiiiska ka dhigeysa mid ka mid ah heshiisyadii ugu saxiixayaasha badnaa taariikhda Ururka Qaramada Midoobay. Waddamada badan ee heshiiska saxiixay waxay muujiyeen iney si dhab ah ugu dadaali doonaan sidii ay dalalkoodu u rasmiyeyn lahaayeen, u aqbali lahaayeen, una ansaxin lahaayeen heshiiska oo weliba ay u muujin lahaayeen iney ka go'an tahay inaan marna la yareysanayn ujeeddooyinka heshiiskan ku xusan. Dalalka raba iney heshiiskan kusoo biiraan oo ayna u suuro gelin wixii ka horreeyay 29-kii Juun 2004-tii, waxaa u furan iney aqbalaan codsigii kusoo biirista, taasoo ah tallaabo u dhiganta in heshiiskii la saxiixay.

Cahdigu wuxuu dhaqangalay 27-kii Febaraayo 2005-tii, taasoo ah 90 maalmood kaddib markii ay 40 waddan aqbaleen, saxiixeen oo ay ansaxiyeen heshiiskii. Laga billaabo taarikhdaas, afartankaas dal ee saxiixay caqdigan waxaa waajib ku noqoneysa iney fuliyaan qodobbada heshiiskani qorayo. Dal kasta oo saxiixa, oggolaada oo ansaxiya heshiiskan ama markaa kaddib aqbalaaddiisa u soo gudbista si waafaqsan shuruurdaha ku xusan farxadda 1-aad ee qodobka 16-aad ee heshiiskan, dhaqangalka cahdigu wuxuu u billaabanayaa 90 maalmood kadib maalintii ay soo gudbiyeen saxiixiddooda, ogolaanshahooda, ansaxintooda ama codsi aqbalkooda. Urur gobaleedyada isufurka dhaqaalahu wuxuu dhaqangalku uga billaabanayaa 90 maalmood kaddib maalinta ay soo gudbiyaan aqbalaaddooda ama xaqiijintooda.

Xiriirrada caalamiga ah ee sameysmay intii la waday wadahalkii lagu diyaarinayay caqdiga WHO ee Xakameynta Tubaakada ayaa muhiim u noqoneysa in hergelinta

Cahdiga loo dhaadhiciyo ilaa heer waddan, sida uu afkiisa ka shegayo Agaasima Guud ee Ururka Caafimaadka Adduunka WHO, John-wook Lee:

“wadahadalladii lagu diyaarinayay Caqdiga WHO ee Xakameynta Tubaakadu waxay keeneen isbeddello la taabadan karo oo heer waddan ah. Guusha cahdigani uu ku noqon karo aalad lagu ilaaliyo caafimaaadka guud ee bulshada waxay ku xiran tahay hadba sidii aan ula nimaado firfircooni iyo go’aanno dhaba oo siyaasadeed oo aan ku bixineyno sidii sanadaha soo socda heshiiskan looga hirgelin lahaa waddamada saxiixay oo dhan. Guusha Cahdigu waa mid dan u ah caafimadka guud ee bulshada caalamka.”

Si arrintan looga dhabeeyo, xamaasaddii iyo qasdigii muuqday intii wadahadalladu socdeen ayaa loo baahan yahay in lagu fidiyo heer qaran ilaa iyo gobalba, si Cahdigani u noqdo mid dhab ah oo si weyn loogu xisabtamo.

HORDHAC

Qaybaha Caqdigan saxiixay,

Ayagoo ay ka go'an tahay iney mudnaanta siiyaan xaqooda ah ah iney dhowraan caafimaadka bulshada,

Ayagoo garowsan in sii fididta isticmaalka tubaakadu uu yahay mushkilad caalami ah oo cawaaqib xun ku reebeysa caafimaadka bulshada, kaas oo u baahan in adduunyadu ka yeelato iskaashi weyn, dalalkuna uga qeybqaataan si habboon oo wax ku ool ah iyo in caalamku jawaab waafiya ka bixiyo,

Ayagoo ka jawaabay walaaca adduun weynuhu ka qabo dhibaatad caafimaad, bulsho, dhaqaale iyo cirib xumada degaan ee ka dhalaneysa isticmaalka tubaakad iyo in bulshada lagu dhex cabbo,

Ayagoo aad uga walaacsan kororka adduunyada guud ahaan uga socda istimaalka iyo soosaarista sigaarka iyo badeecadaha kale ee tubaakada laga sameeyo, gaar ahaan waddamada soo koraya, sidoo kalana ka walaacsan culeyska ay arrintaas saareeyso qoysaska, masaakiinta iyo hay'adaha caafimaad ee waddamada,

Ayagoo garowsan in caddaymaha saynisku ay si cad u tilmaameen in isticmaalka tubaakada iyo qiiceeda oo hawada laga qaataba ay sababaan geeri, cudur iyo curyaamid, laakiin uu waqti u dhexeeyo xilliga uu qiica tubaakadu kugu baxay ama aad isticmaashay wayaaba kaloo tubaakada laga sameeyay iyo goorta ay kugu soo baxayaan cudurrada tubaakada laga qaado,

Ayagoo garowsan in sigaarka iyo wayaabaha kae ee tubaakada ka sameysanba loo farsameeyay si heer sare ah oo qofka ka dhigeysa mid qabatimay oo si joogto ah ugu tiirsan tubaakada, isla markaana garowsan in waxyaabaha ay ka sameysan yihiin iyo qiica ay bixinaayaanba ay yihiin kuwo cilmidawo ahaan firfircoon, sun ah, jirbaabiye ah oo kansar-sidena ah, isla markaana qabatinka tubaakada si gooniya loogu gartay wax khilaafsan nidaamkii caaamiga ahaa ee cudurrada lagu kala sooci jiray,

Ayagoo qiran iney jiraan caddeymo buuxa oo cilmi ku dhisan oo muujinaya in cabista tubaakada ee hooyada uurka lehi ay wax weyn u dhinto caafimaad iyo korriimda carruurta yaryar,

Ayagoo si qotodheer uga walaacsan in ay aad usoo badanayaan carrruurta yaryar iyo kuwa gaashaanqaadka ah ee sigaarka cabba dunida oo dhan amaba siyaabo kale u isticmaala tubaakada, gaar ahaan waxaa aad usoo kordhaya kuwa sigaar cabista billaabaya ayagoo da'doodu ay aad u yar tahay.

Ayagoo ku baraarugay kororka ku socda haweenka iyo gabdhaha da'day yar ee sigaarka caba dunida oo dhan ama isticmaala noocyada kale ee tubaakada, isla markaana maanka ku haya baahida loo qabo in haweeenka si buuxda looga qeybgeliyo go'aan qaadashada siyaasadeed iyo fulintoodaba, ogsoonna baahida loo qabo in la helo istaraajiyad hal-jinsile ah oo lagu xaakameeyo isticmaalka tubaakada,

Ayagoo si gundheer uga walwalsan heerka xun ee ay dadka degaanka ahi ka gaareen cabista sigaarka iyo isticmaalka noocyada kale e tubaakada,

Ayagoo si weyn uga walaacsan saameynta xun ee ay yeelanayaan noocyada xayeysiinta, bogaadinta iyo sii kala qaadashada xayeysiintu ee ku wajahan dhiirrigelinta isticmaalka tubaakada,

Ayagoo garowsan lagama maarmaannimada qaadista tallaabooyin la iska kaashanayo si loo baabi'iyo ka ganacsiga sharci darrada ah ee sigaarka iyo noocyada kale ee tubaakada, oo ay ku jirtto qarsoodi isugu gudbinta, warshadeynta sharci darrada ah iyo ka beenabuurista badeecada,

Ayagoo garowsan in xakameyta tubaakada ee heer kasta ay u baahan tahay kheyraad farsamo iyo mid maaliyadeed oo waafaqsan baahida taagan ama midda ku talogalka ah ee loo isticmaalayo howlaha lagu xakameynayo tubaakada, waxaana ugu daran dalalka soo koraya iyo kuwa dhaqaalahoodu kala guurka ku jiro.

Ayagoo garowsan baahida loo qabo sameynta nidaam sax ah oo lagu wajahayo rajada dhaqaale iyo tan bulsho ee waqtiga fog ee lagu gaaraayo in la helo istaraatiijiyad si guul leh loogu dhimayo dalabaadka tubaakada,

Ayagoo ka warqaba dhibaatooyinka dhaqaale iyo kuwa bulsho ee mashaariicda xakameynta tubaakadu ay waqtiga fog iyo kan dhexaba ku keenaayaan dalalka soo koraya iyo kuwa dhaqaalaahooda kal guurka ku jiro, isla markaana ay garowsan yihiin baahida ay dalalkaasi u qabaan in loo fidiyo kaalmo maaliyaded iyo mid farsamo si ay u sameystaan istaraatiijiyaad Horumarin Qaaran oo ay ku gaaraan horumar waara,

Ayagoo ogsoon howlaha qiimaaha leh ee ay dalal badani ka qabteen xakameynta tubaakada, isla markaana bogaadinaya hoggaanka ururka Caafimaadka Adduunka iyo dadaallo ururro kale iyo kooxo nidaamka Qaraamada Midoobay ka mid ah iyo hey'ado caalami ah iyo ururro dowlado ka dhexeeyaa ay ka geysteen sameynta habab lagu xakameeyo tubaakada,

Ayagoo caddeynaya doorka shariifka ah ee hay'adaha soo socda ay ka qaateen dadaalada loogu jiro xakameynta tubaakada si heer qaran ah iyo heer caalamiba ah iyo muhimadda uu ka qeybgalkoodaasi u yeeshay dadaaladii socday ee lagula tacaalayay tubaakada, dadaladaasoo u socday si heer caalami ah iyo si heer qarameed ahba. Hay'adaha

dadaalkooda la mahdiyay waxaa ka mid ah ururrada aan dowliga aheyn, xubnaha bulshada rayidka ee aan ku lugta yeelan shirkada tubaakada, oo ay ku jiraan howlwadeennada arrimaha caafimaadka, ururrada haweenka, dhallinyarada, kuwa u dhaqdhaqaaqa degaanka iyo kooxaha kale ee wax iibsada, waxaa kaloo qeyb ka ah hey'adaha daryeelka caafimaad iyo khubarro kale,

Ayagoo garowsan baahida loo qabo in laga foojignaado dadaal kasta oo shirkadaha tubaakadu ay ku doonayaan iney ku yareystaan ama ku naxuusiyaan dadaalada lagu xakameynayo tubaakada iyo baahida iyadna loo qabo in leysku wargeliyo dhaqaaqyada ay wadaan shirkadaha tubaakadu kuwaas oo saameyn taban ku yeelanaya dadaalada socda ee lagu xakameynayo tubaakada,

Ayagoo xasuusan qodobka 12-aad ee cahdigii caalamiga ahaa ee xuquuqda bulsho, dhaqaale iyo dhaqan, kaas oo qoraya xaqqa uu qof walba u leeyahay inuu ku noolaado heerka caafimaad ee ugu sarreeya , xag jireed iyo xag maskaxeedba. Cahdigaas waxaa laga ansaxiyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 16-kii Diseembar 1966.

Ayagoo xasuusan hordhicii Dastuurka Ururka Caafimaad Adduunka, kaas oo sheegayay in ku noolashada heerka caafimaad ee ugu sarreeysa ay tahay xuquuq qof kastoo banii'aadam ahi uu leeyahay, iyadoo lagu kala sooceyn qolo, diin, aragti siyaasadeed ama heer dhaqaale ama bulshomidna,

Ayagoo ay ka go'an tahay iney dhiirrigeliyaan in hababka lagu xakameynayo tubaakadu ay noqdaan kuwo ku saleysan aqoonta saynis, tan teknoolojiyo iyo awoodda dhaqaale ee xilligan jirta.

Ayagoo xasuusta cahdigii Ciribtirka Faquuqidda Haweenta ee uu meel mariyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay 18-kii Diseember 1979, kaas oo dhigayay in waddamada saxiixay heshiiskan uu mid walba gaarkiisa u sameysto habab dhammaan goobaha caafimaadka looga ciribtirayo faquuqidda haweenka,

Ayagoo misana xasuusta Cahdigii Ilaalinta Xuquuqda carruurta ee laga ansaxiyay fadhigii Golaha Guud ee Qaramada Midoobay ee 20-kii Nofeembar 1989, kaas oo dhigaya in dalalka cahdigan saxiixay ay garowsadaan xaqqa uu canuggu u leeyahay inuu helo daryeelka caafimaad ee ugu heerka sarreeya,

Waxay isku raaceen sida soo socota:

QEYBTA 1: HORDHAC

Qodobka 1aad

Ereyada heshiiska

Si waafaqsan ujeeddada caqdiga:

(b)"Ganacsiga Reeban" waxaa loola jeedaa howl kasta iyo macaamil kasta oo sharcigu diidaay, kaas oo ku saabsan soo saarista, raridda, qabashada, hanashada, sii qeybinta, iska gedidda ama soo iibsashada, oo ay ku jirto howl walba ama macaamil kasta oo loo qasday in lagu fududeeyo howlaha noocaas ah.

(t) "urur gobaleedka isu furka dhaqaalaha" waxaa loola jeedaa urur ay ku midoobeen dhowr dal oo madaxbannaan, kaas oo xubin kastoo ka mid ah la siiyay awood uu wax uga qaban karo arrimo dhowr ah, oo ay ka mid tahay awood uu ku qaadan karo go'aan xubnaha kale ee ururku ay ku qasban yihiin iney xushmeeyaan;

(j) "xayeysiinta iyo dhiirrigelinta tubaakaada" waxaa loola geeda nooc kastoo ah xayeysiin warbaahineed, ammaanid iyo falkasta oo leh ujeedo iyo saameyn keeni karta iney dhiirrigelin u noqoto badeecooyinka tubaakada ama isticmaalka tubaakada si dadban iyo si toos ahba;

(x) "xakameynta tubaakada" waxaa loola jeedaa istaraatiijiyado dhowr ah oo lagu yareynayo soosaarista, dalabka iyo waxyeelada tubaakada, istaraatiijiyadahaas oo looga danleeyahay in lagu hagaajiyo caafimaadka guud ee dadka, iyadoo la tirtirayo ama la dhimayo isticmaalka badeecadaha tubaakadaha laga sameeyo ama in lagu cabbo goobaha dadweynaha;

(kh) "shirkadaha Tubaakada" waxaa laga wadaa shirkadaha tubaakada soosaara, kuwa jumlada ku iibiya iyo kuwa sii tafaarikh gadeeya badeecadaha tubaakada;

(d) "Badeecadaha tubaakada" waxaa loola jeedaha badeecadaha qeyb ahaan ama gebigoodba ka sameysan caleenta tubaakada oo alaab ceyrriin ahaan loo isticmaalay, kuwaas oo loo wershadeeyay si loo cabbo, loo jaqo, loo calaliyo ama sanka looga jiido;

(r) "wakiilasho tubaako," waxaa loola jeedaa qaab kasta oo lagu taageerayo munaasabad, howl ama shaqsi leh ujeeddo sababi karta iney dhiirrigelin u noqoto soosaarista tubaakada iyo isticmaalkedaba, si dadban iyo si toos ahba;

Qodobka 2aad

Xirirka ka dhexeeya Caqdigan Iyo Heshiisyada iyo Aaladaha Sharci Ee Kale

1. Si caafimaadka dadka loogu dhowro si sidan ka fiican, waxaa qeybaha oo dhan lagu dhiirigelinayaa iney la yimaadaan nidaamyo ka dheeraad ah kuwa ku qoran caqdigan iyo heshiisyadiisa, ma jiraan wax hashiiskan ku jira oo qeybaha ka hor joogsanaya iney soo rogaan nidaamyo adadag oo caqdiga wafaaqsan, kana hor imaaneyn shuruucda caalamiga ah.

2. Qodobbada Cahdigan iyo heshiisyadiisuba wax u dhimi maayaan xaqa dal walboo saxiixay uu u leeyahay inuu si gooni ah heshiis ula galo dal ama dalal kale oo badan, oo ay ka mid yihiin dowlad Gobaleedyo ama qaar ka mid ah dowladaha Gobalka. Waxay ka heshiinayaan arrimo xiriir la leh ama ka baxsan Cahdigan iyo heshiisyadiisa, laakiin waxaa shardi ah in ay heshiisyadaasi noqdaan kuwa la socon kara waajibaadkii ay Cahdigan iyo heshiisyadiisu saarayaan dalka heshiiska gelaya. Dhinacyada heshiiska gaar ah gelayaahi waa in ay warbixnta heshiiska u gudbiyaan Shirka guud ee saxiixayaasha Cahdiga iyagoo usii marinaya Xafiiska Xoghayaha.

QEYBTA II: UJEEDDADA, MABAADII'DA LA RAACAYO IYO WAAJIBAADKA GUUD

Qodobka 3aad

Ujeeddada

Ujeeddada Cahdigan iyo hashiisyadiisu waxaa weeye in laga difaaco jiilasha mustaqvbalka iyo kuwa hadda nooba baaba'a caafimaad, dhaqaale, bulsho iyo degaan ee ka dhalan karta isticmaalka tubaakada iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha, ayadoo jaangooyo loo sameynayo hababka lagu xakameynayo tubaakada, taaso ay tahay in qeybahoo dhami ay ka hirgeliyaan heer qaran, heer gonal iyo heer caalamiba si loogu yareeyo isticmaalka baahsan ee tubaakada iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha si joogto ah oo wax ku ool ah.

Qodobka 4

Mabaadii'da la raacayo

Si loo gaaro ujeeddooyinka laga leeyahay cahdigan iyo heshiiskiisa, loona dhaqangeliyo qodobbadiisa, dhinacyada oo dhan waxaa laga doonayaa, arrimaha kale ka sokow, iney raacaan mabaadii'da hoos ku qoran:

1. Qof kasta waa in lagu wargelyaa cawaaqib xumada caafimaad, dabciga qabatinka leh iyo haliska dhimasho ee kaga imaan karta isticmaalka tubaakada iyo ku cabistiisa goobaha dadweynaha, isla markaana laga fekero xeerar, fulin, maamul iyo habab kale oo laga hirgeliyo heer dowladeed si looga difaaco qof kasta waxyeelada uga imaaneysa tubaakada lagu cabayo goobaha dadweynaha.

2. Waxaa loo baaan yahay go'aanno adag oo siyaasadeed oo si heer qaran, heer gobal iyo heer caalami ah loogu diyaariyo habab faahfaahsan oo qeyb qeybsan iyo ka falcelin isku xiran, ayadoo la tixgelinayo:

b) Baahida loo qabo in la qaado tallabooyin qof kast looga difaacayo in dhib kasoo gaaro tubaakada lagu dhex cabayo dadka.
t) Baahida loo qabo in la qaado tallaabooyin looga hortagayo in lagu soo biiro isticmaalka tubaakada, laguna dhiirrigelinayo oo lagu taageerayo joojinteeda, hoosna loogu dhigo isticmaalka nooc kasta oo tubaako ah.
j) Baahida loo qabo in la qaado tallabooyin shaqsiyaad caadi ah iyo bulshadaba looga qeybgelinayo dejinta, dhaqangelinta iyo qiimeyta mashaariic lagu xakameynayo tubaakado, kuwaas oo bulsho iyo dhaqan ahaanba ku habboon baahidooda iyo himmadooda, iyo
x) Baahida loo qabo in la qaado tallaabooyin lagu abbaarayo khataraha jinsi gaar ah heysta, marka la dejinayo istaraatiijiadda lagu xakameynayo tubaakada

3. Iskaashi caalami ah, gaar ahaan isdhaafsiga teknooloojiyada, aqoonta iyo kaalmo maaliyadeed iyo isa siinta khibradaha la xiriira, si loo sameeyo, loona hirgeliyo mashaariic wax ku ool ah oo lagu xakameynayo tubaakada ayaa qeyb weyn oo muhiima ka ah cahdigan, Iyadoo la xusmeynayo dhaqan hoosaadka degaanada, isla markaana lagu xisaabtamayo arrimaha bulsho, dhaqaale, siyaasadeed iyo sharci ee jira

4. Habab faahfaahsan oo kala qeyb qeybsan iyo ka falcelin lagu yareynayo isticmaalka badeecada tubaakada oo heer qaran, heer gobal iyo heer caalami leh ayaa muhiim u ah in si waafaqsan mabaadii'da caafimaaad guud looga hortago soo noqnoqoshada cudurrada, curyaamidda carrruurta iyo geerida ay sababto isticmaalka tubaakadu iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha.

5. Arrinta la xiriirrta qaadashada mas'uuliyadda qolo waliba ay si gaara ugu xustay sharciyadeeda ayaa qeyb muhiima ka ah xakameyn ballaaran oo lagu sameynayo tubaakada.

6. Muhimadda ay leedahay kaalmo dhaqaale iyo mid farsamo oo la siiyo dadkii tubaakada beeri jiray iyo kuwii ka shaqeyn jirey beeraha tubaakada, kuwaas oo uu ku yimid kala guur dhaqaale, ka dib markii noloshoodii ay saameyn xun ku yeeshaan barnaamijyadii lagu xakameynayay tubaakada, kuwaas oo ku nool dalalka soo koraya iyo kuwa

dhaqaalahoodu kala guurka yahay, oo ka tirsan saxiixayaasha cahdiga, ayaa waxaa habboon in la aqoonsado and la abbaaro marka dal walba degsanayo istaraatiijiyaddiisa qaran ee lagu higsanayo horumar waara.

7. Ka qeybgalka bulshada rayidku waxay muhiim u tahay gaarista ujeeddooyinkii laga laahaa caqdigan iyo heshiisyadiisa.

Qodobka 5aad

Waajibaadka Guud

1. Xubin walba oo ka tirsan saxiixayaashu waxay degsaneysaa, hirgelineysaa, oo xili-xili u cusbooneysiineysaa, dibna u eegeysaa istaraajiyad qaran oo qeybqeysan oo lagu xakameynayo tubaakada, iyo qorshe iyo mashaariic si waafaqsan cahdigan iyo heshiisyadiisa kaasoo ay xubintu qeyb ka tahay,

2. Isla ujeeddadaas darteed, ayay xubnuhu si la' eg awooddooda waxay u:

(a) Sameysanayaan, xoojinayaan oo maalgashanayaan hannaan qaran oo isku xiran oo tubaakada lagu xakameynayo ama qof wakiil ah ayay u magacaabayaan.

(a) Meel marinayaan oo fulinayaan xeerar, fulin, maamul wax tar leh iyo/ama habab kale, waxayna qeybaha kale si habboon uga wada shaqeynayaan sameynta siyaasado qumman oo looga hortegayo, laguna yareynayo cunista tubaakda, qabatinka Nicotine-ka iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha.

3. Marka ay dejinayaan oo dhaqangelinayaan siyaasadda caafimaadka guud ee bulshada ee ku saabsan xakameynta tubaakada, qeybuhu waa iney u howlgalaan sidii ay siyaasadahaas uga hor istaagi lahaayeen kooxaha xayeysiiska u sameeya ama danaha ka leh shirkadaha tubaakada, si waafaqsan sharciga dalkaas u yaalla.

4. Qeybuhu waa ineyi ska kaashadaan sameynta habab, nidaamyo iyo habraacyo loo maro hirgelinta Cahdigan iyo heshiisyadiisa, kaasoo ay xubintu qeybta ka tahay.

5. Qeybuhu waxay, markii loo baahdo, hay'adaha caalamaiga ah ee awoodda u leh, kuwa dowladaha gobalka iyo maamullada kaleba iskaashi kala yeelanayaan sidii loo gaari lahaa ujeeddooyinkii laga lahaa Cahdigan iyo heshiisyadiisa ay qeybta ka yihiin.

6. Qeybuhu waxay, si la' eg tabartooda dhaqaale, isaga kaashanayaa sidii loo heli lahaa maaliyad lagu hirgeliyo Cahdigan iyo heshiisyadiisa, iyagoo qaadanaya nidaam maalgelineed oo ka kooban laba dal ama ay dalal farabadan ka qeybqaadanayaan.

QEYBTA III: TALLAABOOYINKA LA XIRIIRA YAREYNTA DALABAADKA TUBAAKADA

Qodobka 6aad

Habab canshuur iyo ascaarta loogu adeegsanayo yareynta dalabaadka tubaakada

1. Qeybuhu waxay aqoonsan yihiin in ascaarta iyo canshuuruhu ay yihiin qaabab wax ku ool ah, muhiimna u ah in isticmaalka tubaakada laga yareeyo qeybo badan oo bulshada ka mid ah, gaar ahaan dhallinyarada.

2. Ayadoo aan lagu xadgudbayn xaqqa madaxbannaanida ay qolo kasta u leedahay iney ayadu go'aansato oo degsato siyaasaddeeda canshuuraha, haddana xubin walba waxaa laga rabaa iney ku xisaabtanto ujeeddooyinka qaran ee Caafimaad ee khuseeya xakameynta tubaakada, ayna meel mariyaan ama ay qaataan habab ay ka mid yihiin:

(b) Hirgelinta siyaasad canshuureed iyo meesha ay ku habboon tahay siyaasad ascaareed oo lagu soo rogayo badeecadaha tubaakada si looga qeybqaato ka miro dhalinta hadafkii caafimaad ee looga dan lahaa in lagu yareeyo isticmaalka tubaakada, iyo

(t) In mamnuucid ama xayiraad, hadba tii ku haabboon, lagu soo rogo iibinta badeecadaha tubaakada iyo shirkadaha caalamiga ah ee canshuur la'aanta dib uga soo dejiyada badeecadahaas.

3. Qeybuhu waa iney shirweynaha Guud ee saxiixayaasha usoo gudbiyaan warbixin xilliyeed ku saabsan qoondada canshuureed ee ay saareen badeecadaha tubaakada iyo jaantus muujinaya heerarka isbedel ee ku yimid isticmaalka tubaakada, si waafaqsan qodobka 21.

Qodobka 7aad

Habab aan ascaarta ahayn oo lagu dhimayo isticmaalka tubaakada

Qeybuhu waxay aqoonsan yihiin jiritaanka habab muhiim ah oo waxku-ool ah, kuwaas oo aan astaar ku saleysneyn, wax weynse ka taraya hoos u dhigidda isticmaalka tubaakada. Xubin kasta waxay gaarkeed u ansaxsaneysaa , una hirgelineysaa xeerar, fulin, maamul iyo habab kale oo lagama maarmaan u ah dhaqangelinta wajibaadka ku xusan qodobbada 8 ilaa 13, waxay kaaloo qeybuhu si toos ah ama si ay u dhexeeyaan hey'ado caalami ah isaga kaashanayaan arrigtiyadoodu ku saabsan qaabka dhaqangelintooda. Shirweynaha Guud ee saxiixayaasha ayaa laga soo jeedin doonaa sida ugu habboon ee loo hirgelin karo qodobbada ku jira heshiiskan.

Qodobka 8aad

Ka diffaacidda in tubaakada lagu cabbo goobaha dadweynaha

1. Qeybuhu waxay aqoonsan yihiin caddeymaha sayniska ee sida cad u muujiyay dhibaatada caafimaad ee ka dhalan karta haddii tubaakada lagu dhex cabbo goobaha dadweynaha.

2. xubin kasta waxay qaadan doontaa, kana hirgelin doontaa goobaha garsoorka sida uu qabo sharci dalku, si firfircoonna ay ugu dhiirrigelinaysaa heerarka kala duwan ee garsoorka iney qaataan oo hirgeliyaan shuruuc, fulin, maamul iyo/ama habab kale oo wax ku ool ah, kuwaas oo looga hortagayo in tubaakada lagu dhex cabbo goobaha shaqo ee dedan, gaadiidka dadeynaha, goobaha xiran ee dadku isugu yimaado iyo goobaha kale ee dadku ku kulmo.

Qodobka 9aad

Xeerarka waxyaabada ay ka koobnaaneyso badeecada tubaakadu

Shirka saxiixayaashu, isagoo kaashanaya hay'adaha caalamiga ah ee awoodda u leh, wuxuu soo gudbinayaa habraacyo lagu tijaabinayo, laguna cabbirayo waxyaabaha ay ka suubsan tahay badeecada tubaakadu iyo waxyaabaha ay bixineyso oo hawada soo raacaya markii la isticmaalayo, habraacyada oo sidoo kale xeer loogu sameeynayo maadooyinka tubaakada ku jira iyo waxa ka baxayaba. Markey oggolaadaan hay'ada qaran ee awoodda u leh, xubin walba waxay sameysaneysaa oo ay dhaqangelineysaa nidaamyo sharci dejin, fulin, maamul iyo habab kale oo wax ku ool ah oo loo isticmaalayo tijaabinta iyo cabbiraadda xeerarkaas.

Qodob 10aad

Shaacinta waxa badeecadaha tubaakadu ka suubsan yihiin.

Xubin walba waxay, si waafaqsan shuruucda dalkeeda, u sameysaneysaa, una hirgelineysaa sharci dejin, fulin, maamul iyo habab kale oo wax ku ool ah, kuwaas oo soosaarayaasha iyo soo dejiyayaasha badeecadaha tubaakada ku xukumaya iney hay'adaha dowladda waxbixin ka siiyaan waxyaabaha ku jira iyo waxa ay sii daayaan badeecada tubaakadu. Xubin kasta waxay gaarkeeda usii sameysan doontaa, una dhaqangelin doontaa habab waxtar leh oo dadweynah lagula socodsiinayo suntan ku jirta badeecadaha tubaakada iyo waxyaabaha ay hawada kusii deynayaanba.

Qodob 11

Galeynta iyo sumadeynta badeecada tubaakada

1. Seddax sano gudahood laga billaabo maantii ay saiixday Cahdiga, xubin walba waxay si waafaqsan sharciga dalkeeda u sameysaneysaa oo dhaqangelineysaa hababwaxtaar leh oo lagu xaqiijinayo in:

(b) Galeynta (baakadeynta) iyo suntidda badeecaha tubaakadu ayna noqon kuwo lagu ammaanayo badeecaddii tubaakada, iyadoo la isticmaalayo qaabab ku dhisan been, marinhabaabin, qiyaano iyo waxyaabo abuuri kara in aragti qaldan laga qaato daabcigii badeecada, saameynteeda caafimaad, khatarteeda ama waxyaabaha ay sii deyneyso, sumadahaas oo ay ka mid yihiin erey kasta, tilmaan kasta, magac ganacsi, sawir ama astaan kale oo muujineysa in badeecad tubaako oo gaar ahi ay ka khatar yar tahay badeecad kale oo tubaako.

(t) Baakaddii iyo kartoonkii la gelinayo hal shey oo ka mid ah badeecada tubaakada iyo wixii badeecadaas dusha looga sii baakadeeyo iyo summaddi dusha looga qorayaba waa in ay ku dhigan tahay digniin caafimaad oo muujineysa dhibaatada ay leedahay isticmaalka tubaakadu. Digniinadaas iyo farriimahaasba waxaa:

(i) Oggolaanaya hadba hay'adda Qaran ee awoodda u leh.

(ii) Waana isbedbedeli doonaan

(iii) Waxay noqon doonaan kuwo waaweyn, nadiif ah, muuqda oo la akhrin karo

(iv) Waa in digniinaha iyo xayeysiinadu ay 50% ama ka badan lagu soo bandhigaa goobaha ugu muhiimsan, kamana yaraan karaan 30% goobaha muhiimka ahi.

(v) Waa in ay ku jiraan ama loo soo bandhigaa sawir ahaan ama qaab jaatus ah.

2. Halkii baakad iyo halkii kartoon ee la gelinayo badeecada tubaakada iyo wixii dusha looga sii baakadeeyo iyo sumadihii dusha loo qorayo, oo ay wehliyaan digniinihii lagu cadeeyay farqadda 1(b) ee qodobkan, Waa iney ku jirtaa xog abaareysa waxyaabaha ay ka kooban tahay iyo waxyaabaha ay bixineyso badeecada tubaakado sida ay u jideeyeen maamulada dowladdu.

3. Xubin kasta waxay dalbaneysaa in digniinaha iyo xogaha qoran ee ku xusan farqadda 1(b) iyo farxqadda 2 ee qodobkan ay ka muuqdaan baakadda iyo kartoonka ay ku jirto badeecada tubaakadu iyo in baakadada guud iyo summadaha dusha looga dhigayaba ay ku qoran yihiin luuqadda ugu muhiimsan ee beecaddan loo isticmaalo.

4. Marka laga hadlayo ujeeddada qodobkan, hadalka “baakadaha iyo summadeynta kore”waxaa loola jeedaa baakadeynta iyo summadeynta loo adeegsado badeecadaha tafaariiqda ah.

Qodobka 12

Tacliinta, warbaahinta, tababarka iyo wacyigelinta

Xubin kasta waxay dhiirrigelineysaa oo xoojineysaa in dadka lagu wacyigeliyo arrimaha xakameynta tubaakada, ayadoo sida ugu habboon u isticmaaleysa dhammaan aaladaha warbaahineed ee jira. Si ujeeddadan loo gaaro, xubin walba waxay qaadaneysaa oo ay dhaqangelineysaa hannaan sharci dejin, fulin, maamul iyo haabab kale oo waxku-ool ah, si loo dardar geliyo howsha:

(b) In la helo mashaariic wacyigelin iyo aqoonkororsi ah oo dadka lagu barayo halista caafimaad ee jirta oo ay ka mid tahay dabciga qabatinka leh ee la xiriira isticmaalka tubaakada iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha.

(t) Wacyigelin dadweyne oo ku saabsan halista caafimaad ee ku sugan isticmaalka tubaakada iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha iyo faa’iida ku jirta joojinta isticmaalka tubaakada iyo habnololeed aan tubaako laheyn.

(j) Dadku iney helaan, si waafaqsan sharciga dalka, xog ballaaran oo ku saabsan shirkadaha tubaakada si waafaqsan ujeeddoyinka Cahdigan.

(x) Barnaamijyo lagu bixinayo tababarka qumman oo waxtar leh, dadka lagu fahamsiinayo, laguna wacyigelinayo howlaha xakameynta tubaakada, kaas oo la siinayo shaqaalaha caafimaadka, dadka jaaliyadaha ka shaqeeya, dad bulshada u adeega, xirfadlayaasha saxaafadda, macallimiinta, dadka go’aan gaarista leh, maamulayaasha iyo shaqsiyaadka kale ee ay khuseyso.

(kh) Wacyigelinta, iyo in dadweynaha, hay’adaha gaarka ah iyo ururrada aan dowliga ahayn ee aan ku dhex milmin shirkadaha tubaakada laga qeybgeliyo dejinta iyo hirgelinta mashaariic qeyb walba leh iyo istaraatiijiyad loo dejiyay xakameynta tubaakada, iyo

(d) Wacyigelinta dadweynaha iyo la socodsiinta xogaha ku saabsan dhibaatooyinka caafimaad, dhaqaale iyo midda deegaan ee laga kulmayo soosaarista iyo isticmaalka tubaakada.

Qodobka 13

Xayeysiinta, dhiirrigelint iyo wakiilashada tubaakada

1. Qeybaha oo dhami waxay garowsan yihiin in cunaqabateyn ballaaran oo lagu soo rogo xayeysiinta, dhiirrigelinta iyo wakiilashada tubaakadu ay yareyn doonto soosaarista iyo isticmaalka badeecada tubaakada.

2. Xubin walba waxay, si waafaqsan dastuurkeeda iyo maadii'deeda dastuuriga ah, cunaqabateyn weyn u saari doontaa dhamman xayeysiimaha tubaakada, dhiirrigelintooda iyo wakiilashadooda. Tan waxaa ka mid ah, ayadoo la eddegsanayo shuruuc degaan iyo qaabab kaloo farsamo oo ay xubintu leedahay, cunaqabateyn ballaran oo la saarayo xayeysiiska xuduudaha isaga tallaaba, dhiirrigelin iyo wakiilnimo kasoo billaabatay dhulka xubintaas. Ayadoo taas la qaddarinayo, shan sano gudaheed laga soo billaabo maalintii uu Cahdigani u dhaqangalay xubintaas, xubin walba waxay sameysaneysaa sharci dejin, fulin, maamul iyo habab kale oo ku habboon, waxayna soo gudbineysaa warbixin, sida uu qabo qodka 21.

3. Xubintii aan awood u laheyn iney soo rogto cunaqabateyn ballaran sabab la xiriirta dastuurkeeda iyo mabaadii'deeda dastuuriga ah awgeed, waxay dabaqeysa xayiraadaha saaran xayeysiinta tubaakada, dhiirrigelinta iyo wakiilnimada. Tan waxaa ka mid ah in, ayadoo adeegsaneysa shuruuc degaan iyo qaabab farsamo oo ayada u gaar ah, xayiiraad saarto ama cunaqabateyn weyn dul dhigto xayeysiinta, dhiirrigelinta iyo wakiilnimada kasoo billabaatay dhulka xubintaas. Ayadoo taas la tixgelinayo, xubin kasta waa in, muddo shan sano gudahood ah oo kasoo billaabata maalintii uu cahdigani u dhaqangalay xubintaas, ay ku sameysataa nidaamyo habboon oo leh sharci dejin, fulin, maamul iyo/ama habab kale, waxayna soo gudbineysaa warbixin, sida uu qabo qodobka 21.

4. Halka ugu yar, xubintu, si waafaqsan dastuurkeeda iyo mabaadii'deeda dastuuriga ah, waxay:

> (b) Mabnuuceysaa dhammaan noocyada xayeysiinta, buubbuuninta iyo wakiilnimada dhiirigelinaya soosaarista badeecada tubaakada oo leh qaab kasta oo ay ka mid tahay been, marin habaabin ama khiyaano ama laga yaabo iney keento in aragti qaldan laga qaato badciga tubaakada, saameynteeda caafimaad, halisteeda iyo waxyaabaha ay hawada gelineyso;
>
> (t) Dalbeysaa in digniinaha caafimaad iyo farriimaha ku habboon ay la socdaan dhammaan xayeysiiska tubaakada iyo sidoo kale dhiirrigelinta iyo wakiilnimada;
>
> (j) Xayireysaa adeegsiga soo jiidashada tooska ah ama tan dad badan taas oo dadweynaha ku dhiirrineysa iney iibsadaan badeecadaha tubaakada;
>
> (x) Ka dalbeysaa, haddeysan jiran cunaqabateyn ballaaran, hay'adaha dowladda ee ay khuseyso iney bandhigaan kharashka ay shirkadaha tubaakadu ku bixiyaan

xayeysiiska, dhiirrigelinta iyo wakiilniamada ee aan weli la mabnuucin. Hay'adahaasi waxay go'aansan karaan iney tirooyinkaas loo gudbiyo, sida sharciga dalku dhigayo, dadweynaha iyo shirweynaha saxiixayaasha, sida waafaqsan qodobka 21.

(kh) Qaadeysaa cunaqabateyn ballaaran, hadii aysan xubintu awoodin soo rogista cunaqabteyn ballaaran sababo la xiriira dasuurkeeda iyo mabaadii'deeda dastuuriga ah, waxay xayireysaa xayeysiinta tubaakada dhiirrigelinta iyo wakillnimada idaacadaha, talefishinnada, wargeysyada iyo weliba saxaafadda kale, sida internetka, muddo shan sano gudaheed ah,

(d) Mabnuucaysaa, ama haddii xubintu ayna laheyn awood ay wax ku mabnuucdo sababo la xiriira dastuurkeeda ama mabaadii'deeda dastuuriga ah awgeed, waxay xayiraad saareysaa wakiilnimada tubaakada ee lagu soo tebinayo munaasabaheeda iyo/ama kala qeybgalayaasheeda.

5. Qeybaha waxaa lagu boorinayaa iney la yimaadaan nidaamyo kale oo ka dheeri ah waajibaadka uu qorayo farqadda afraad ee isla qodobkan

6. Qeybuhu waxay iska kaashanayaa sameynta teknooloojiyad iyo habab kale oo lagama maarmaan u ah iney fududaato tirtirista xayeysiimaha xuduudaha ka tallaaba.

7- Qeybaha cunaqabateyta saaray xayeysiinta, dhiirgelinta iyo wakiilnimada noocyo ka mid ah tubaakada, waxay madaxxbannaani u heleysaa xaqqa ah iney iyadna cunaqabateyn saaraan xayeysiinta, dhiirrigelinta iyo wakiilnimada tubaakada xaduudaha kasoo gudbeysa ee soo geleysa dhulkooga, ayna kusoo rogaan ciqaab la mid ah tan xayeysiinta, dhiirigelinta iyo wakiilnomada badecaha gudaha la saaro ee dhulkooda ka billaabatay, si waafaqsan shuruucda dalka. Faqraddani ma taageereyso, mana oggolaaneyso ciqaab gaar ah.

8. Qeybuhu waxay ka fiirsan doonaan faafaahinta heshiis salka u dhigaya habab qumman oo u baahan wadashaqeynta Adduunka si cunaqabateyn ballaaran loogu soo rog xayeysiisyada, dhiirrigelinta iyo wakiilnimada tubaakada ee xuduudaha isaga gudba.

Qodobka 14aad

Tallaabooyin hoos loogu dhigayo dalabka iyo qabatinka tubaakada si loo joojiyo tubaakaada.

1. Xubin kasta waa in ay hormarisaa oo si hagaagsan oo dhammeystiran u faafisaa tilmaamo ku salaysan cilmi iyo dhaqan wanaag, iyadoo la tixgelinayo duruufaha guud iyo sida ay u kala mudan yihiin, waana in la qaadaa tallaabooyin wax ku ool ah si kor loogu qaado joojinta isticmaalka tubaakada,daaweyn ku filanna loogu helo ku qabatinka tubaakada.

2. Iyadoo taa maanka lagu hayo, dhinac kasta wuxuu ku dadaali doonaa inuu:

(b) Qaabeeyo oo hirgeliyo barnaamijyo wax ku ool ah oo loogu talagalayo dhiirigelinta joojinta isticmaalka tubaakada, gaar ahaan xarumaha waxbarashada, xarumaha caafimaadka,goobaha shaqada iyo goobaha cayaaraha;

(t) waxaa ka mid ah ogaanshaha iyo daaweynta ku xirnaanta tubaakada iyo ka talabixinta joojinta isticmaalka tubaakada iyadoo loo marayo barnaamijyo caafimaad iyo waxbarasho heer qaran ah, qorshooyin iyo istiraatiijiyado ay si wanaagsan uga qaybgalayaan shaqaalaha caafimaadka iyo horjoogayaasha bulshada;

(j) Dhisidda xarumo daryeel caafimaad iyo xarumaha baxnaaninta, barnaamijyo wax lagu ogaanayo, kala talinta, ka hortagga iyo daaweynta tubaakada; iyo
(x) La shaqeyntaqeybaha kale si loo fududeeyo suurtagalnimada daaweynta ku xirnaanta tubaakada, sida maaddooyinka daawooyinka ku jira si waafaqsanQodobka 22aad. Maaddooyinkaas iyo kuwa la midka ahwaxa ay ku jiri karaan daawooyinka loo isticmaaloogaanshaha iyo daaweynta marka ay habboon tahay.

QAYBTA 5aad: TALLAABOOYIN KU SAABSAN YAREYNTA ISTICMLAAKA TUBAAKADA AMA BUURIGA

Qodobka 15aad

Ganacsiga sharci darrada ah ee Tubaakada

1. Dhinacyadu waxa ay ogaanayaan in la mamnuucay dhammaan noocyada ganacsiga sharci darrada ah ee tubaakada, oo ay ka mid yihiin tahriibinta, wax soo saarka sharci darrada ah, koontorobaanka iyoHorumarinta iyo hirgelinta arrimaha la xiriiraTubaakada. Waxa intaa dheer, heshiisyada deegaanka, kuwa gobolka iyo heshiisyada caalamiga ahba, waa qaybo muhiim u ah xakameynta tubaakada.

2. Dhinac kasta waa inuumeelmariyaa oo si wax ku ool ah u hirgeliyaa sharci dajinta, fulinta, maamuliddaiyotallaabooyin kale eelagu hubiyo in dhammaan baakadaha iyo kartoomada lagu soosaaro tubaakada la calaamadeeyey, si ay ugu fududaato Dhinacyada in ay ogadaan asalka tubaakadan,iyo in ay waafaqsan tahay sharciga caalamiga ah iyo heshiisyo labo-dhinac ah ama dhinacyo-badan, si ay ugu fududaato Dhinacyada in ay ogadaan qodobbada la jebiyey,dokumentiyada xakameynta dhaqdhaqaaqa tubaakada iyo sharciyaddeeda. Waxaa intaa dheer, dhinac kastaa wuxuu:

(b) ubaahan doonaa baakadaha iyo kartoomada lagu soosaaro tubaakada, ee loo isticmaalo tafaariiq iyo Jumlaba ee lagu gado suuqyada gudaha oo bayaansan: *"waxaa laga gadi karaa oo keliya (geli magaca dalka, deegaanka, gobolka ama federaalka)* "ama qaado wixii calaamado kale oo wax ku ool ah oo muujinaya meesha ugu dambaysa ee la geynayo ama wixii ay maamulladu kuogaan lahaayeen in badeecada si sharci ah loogu iibiyo suuqyadagudaha dalka; iyo

(t) tixgelin doonaa, sida ku habboon, samaynta nidaam maamulku uu ku dabagali karo, kaas oo lagu xaqiijinayoqaybinta iyo fududeynta baaritaanka ganacsiga sharci darradaah.

3. Dhinac kasta wuxuu u baahan doonaa in macluumaadka kartoomaha ama calaamadaha lagu sheegay faqrada 2aad ee Qodobkan lagu soo bandhigoqaab la aqbali karo iyo / ama lagu muujiyoluqadda ama luuqadaha.

4. Iyadoo la eegayo ka takhalusidda ganacsiga sharci darrada ah ee tubaakada, dhinac kasta waa inuu:

(b) Kormeeraa oo ururiyaa xogta ku saabsan ganacsiga xudduudaha ee Tubaakada, oo ay ku jiraan ganacsiga sharci darrada ah, iyo is-dhaafsiga macluumaadka kastamyada, canshuuraha iyo hay'adaha kale, sida ku habboon, oo waafaqsan sharciga caalamiga ah iyo heshiisyo labo-dhinac ama dhinacyo-badan;

(t) Hirgeliyaa ama xoojiyaa sharciyada iyo ganaaxyada ku habboon ee looga hor tagayo ganacsiga sharci darrada ah ee tubaakada, oo ay ku jiraan sigaarka koontarabaanka ah;

(j) Qaadaa talaabooyin ku habboon si loo hubiyo in lala wareegi karo oo la burburin karo dhammaan qalabka lagu sameeyo sigaarka foojariga ah oo koontarabaanka ah, iyadoo la isticmalayo habka ilaalinta deeganka ama loo daadinayo sigaarka si waafaqsan sharciga caalamiga ah;

(x) Soo saaro oo hirgeliyo tallaabooyin lagu kormeerayo, diiwaangelinayo oo lagu xakamaynayokeydinta iyo qaybinta tubaakada, iyadoo lagu ganaaxayo canshuuro adag; iyo

(kh) Inuuqaado tallaabooyin ku habboon, si ay u suurtogasho in lala wareego hantida ganacsiga sharci darrada ah ee tubaakada.

5. Macluumaadka la ururiyey ee ku xusan radi-hoosaadyada 4 (b) iyo 4 (x) ee Qodobkani, waa foomka guud ee qeybaha oo ku jira warbixino xilliyeedka Shirka Qeybaha, si waafaqsan Qodobka 21aad.

6. Dhinacyadu waxa ay si wanaagsan oo waafaqsan sharciga qaranka, u dhiirigelinayaan iskaashiga u dhexeeya hay'adaha qaranka, iyo sidoo kale shuruucda gobolka,shuruucda Caalamiga ah iyo shuruucda ururrada dawliga ah ka dhexeeya, kuwaas oo la xiriirta baaritaanada, ciqaabaha iyo ka qaadidda tallaabooyinka sharciga waafaqsan,iyada oo la eegayo ciribtirka ganacsiga sharci darrada ah ee tubaakada. Muhiimad gaar ah ayaa la siinayaaiskaashiga heerarka goboleed iyo heerarka hoose si loola dagaalo ganacsiga sharci darrada ah ee tubaakada.

7. Dhinac kasta waxa uu ku dadaalayaa in uu soo saaro oo hirgeliyo tallaabooyin dheeraad ah oo ay ku jiraanruqsadaha, marka ay munasib tahay, si loo xakameeyo ama loo xaddido wax-soo-saarka iyo qaybinta tubaakada,loogana hortago ganacsiga sharci darrada ah.

Qodobka 16aad

Ka iibinta tubaakadailmaha yaryar

1. Dhinac kasta waa in uu meelmariyaa oo si wax ku ool ahna u hirgeliyaa sharci dajinta, fulinta, maamulidda iyo tallaabooyin kale ee munaasibka ku ah in dowladdu ay qaaddo, si ay u mamnuucdo ka iibinta tubaakada dadka da'doodu ka yaryahay 18 sano sida sharcigu qabo; tallaabooyinkaasi waxa ay noqon karaan;

(b) Waxaa looga baahan yahay dhammaan iibiyeyaasha tubaakada inay si cad ugu muujiyaangoobahooda ganacsi in ay mamnuuc tahay in tubaakada laga gado carruurta,haddii laga shakiyana, in iibiye kasta uu keeno caddeymo ku filan, taas oo ah in uu ka iibiyey tubaakada dadka sharcigu si buuxda ugu oggol yahay;

(t) Mamnuucida iibinta tubaakada, qaab kasta oo si sahlan dukaamada looga heli karo;

(j) Ka mamnuucidda Shirkadaha Tubaakada soo saara in ay sameeyaan oo ay iibiyaan nacnaca, cuntooyinka fudud, waxyaabaha carruurtu ku dheesho sida (boombalada) iyo wax kasta oo carruurta tubaakada u soo jiidi kara, iyo

(x) Hubinta in mashiinada tubaakada lagu cabbo ay xaddidan yihiin, oo si sahlan aanay carruurtu u heli Karin, oo aanay ku dhiiraneyn carruurtu in ay tubaako gataan.

2. Dhinac kasta waa in uu mamnuucaa ama mamnuucista dhiirigeliyaa, in si bilaash ah tubaakada loo gaarsiiyaa bulshada, gaar ahaanna carruurta

3. Dhinac kasta waa in uu ku dadaalaa inuu mamnuuco iibinta sigaarka,gaar ahaan baakat-baakat, taas oo kor u qaadaysa in carruurtu si dhibyar ku helaan tubaakada.

4. Si loo kordhiyo kartidooda; qeybuhu waxay aqoonsanayaan, tallaabooyinka looga hortagayo ka iibinta tubaakada caruurta yar yar, waana in si wanagsan loo hirgeliyo iyada oo lagu dabbakhayo shuruucda kale ee Axdigan ku jira.

5. Marka la saxiixo, la oggolaado, la aqbalayo ama uu ku biiro axdiga waqti kasta oo ay ahaataba, dhincyaduwaxa ay qoraal ku caddeynayaansida ay uga go'an tahay in la mamnuuco mashiinadatubaakada lagu cabbo ama, sida ugu haboon, ee gebi ahaan loo joojin karo mashiinada tubaakada. Caddaynta loo cuskaday Qodobkan waa in dhammaan dhinacyadu u gudbiyan axdiga / Heshiiska.

6. Dhinac kasta waa in uu meelmariyaa oo si wax ku ool ah u hirgeliyaa sharci dajinta, fulinta, maamulidda iyo tallaabooyin kale ooay ka mid yihiin ganaax lagu soo rogo gadayaasha iyo suuqgeeyeyaasha Tubaakada, si waafaqsan shuruucda ku xusan faqrada 1-5 ee qodobkan.

7. Dhinac kasta waa inuu, sida ku haboon, u ansixiyaa oo u hirgeliyaa hannaan sharci ah, fulineed, maamul ama tallaabooyin kale oo mamnuucaya ka iibinta tubaakada dadkada'dooduka hoosayso 18 ama lagu sheegay sharciga dalka, ama sharciga qaranka.

Qodobka 17aad

Taageeridda hawlaha kale ee dhaqaale ahaan la dabbakhi karo

Dhinacyadu waa inay iskaashi la sameeyaan midbamidka kale, heer gobol, heer dowladeed iyo caalamiba, iyadoo lagu dhiirigelinayo dhaqaale ahaan dadka ka shaqeeya tubaakada hawlo kale oo baddiil ah, haddii ay yihiin kuwa beera, iyo shaqsiyaadka iibiyaba.

QAYBTA V: ILAALINTA DEEGAANKA

Qodobka 18aad

Ilaalintabii'ada iyo caafimaadkadadka

Iyagoo fulinaya waajibaadkooda ku xusan Cahdigan, dhinacyadu waxa ay ku heshiinayaan in ay ilaaliyaan bii'ada iyo caafimaadka dadka iyagoo isha ku haynaya in dhulkooda lagu beero oo laga soosaaro tubaakada.

QAYBTA VI: SU'AALO LA XIRIIRA MAS'UULIYADDA

Qodobka 19aad

Mas'uuliyadda

1. Ujeeddada loo xakameynayo tubaakada, dhinacyadu waxa ay xil iska saarayaan qaadidda tallaabo sharci ah ama xoojinta sharciyada hadda jira, marka ay lagama maarmaanka tahay, si loola tacaalo dambiga shacabka laga galo, oo haddii ay mcquul tahay xataa magdhow laga siiyo

2. Dhinacyadu waa inay iska kaashadan is-dhaafsiga macluumaadka marka ay Shirayaan si waafaqsan Qodobka 21aad, sida:

(b) Macluumaadka ku saabsan saameynta ay tubaakadu ku leedahay caafimaada iyo saameynta qiiqa tubaakada si waafaqsan Qodobka 20.3 (a); iyo

(t) Macluumaadka ku saabsan culuunta sharciyada iyo qawaaniinta la dhaqangeliyay.

3. Dhinacyadu waxa ay si wanaagsan oo wadajir ah isugu raacayaan heerkasharciyada, siyaasadaha, xeerarka dhaqanka iyo hagaajinta heshiisyada ka jira dalka, kuwaas oo qaarba qaarka kale ay iska caawinayaan demibyada shacabka laga galo sida uu qabo Cahdigan.

4. Cahdigan ma saameynayo mana xaddidayo xuquuqaha ay leeyahiin maxkamdaha dhinacyada, waa haddii ay xuquuqahaasi jirto.

5. Shirka Dhinacyadu yeelanayaan waxaa lagu eegayaa, haddii ay suurtogal tahay, marxaladda hore, ku xisaabtanka shaqooyinka heerka caalami ah ee la fuliyay, arrimaha la xiriira masuuliyadda, hababka caalamiga ah ee ku saabsan taageeridda arrimahaas, markii loo baahdo, sharciyada dhinacyadaiyo hawlahooda kale ee waafaqsanqodobkan.

QAYBTA VII: ISKAASHIGA IYO ISGAARSIINTA MACLUUMAADKA CILMIGA KU SALAYSAN

Qodobka 20aad

Daraaseynta, dabagelidda iyo is-dhaafsiga Macluumaadka

1. Dhinacyadu waxa ay ku dadaalayaan inay hormariyaan cilmibaaris qaran si ay isuguduwaan barnaamijyada cilmibaarista heer gobol iyo heer Qaran ah oo ku aaddan xakameynta tubaakada.Sidaa awgeed, dhinac kasta waa in:

(b) Uu billaabaa oo wada shaqeyn toos ah la yeeshaa ururada heer gobol iyo heer qaran iyo hay'adaha kaleba si loo qabto daraaseyn qiima leh oo cilmiyeysan, iyado sidoo kale la dhiirigelinayo cilmi-baarisyada laga sameeyey cawaaqibta isticmaalka tubaakada iyo saameynta qiiqa sigaarka iyo dalagyada kale; iyo

(t) Uu Horumariyaa oo xoojiyaa, iskaashi toos ahna la yeeshaa ururada heer gobol iyo heer qaran iyo hay'adaha kaleba, dhinaca tababarada iyo taageeridda dhammaan hay'adaha ka shaqeeyahawlaha xakameynta tubaakada, sida hawlaha daraaseynta, fulinta iyo qiimeynta.

2. Dhinacyadu waa inay sida ugu habboon u dejiyaan, barnaamijyada heer qaran, gobol iyo heer caalamiba ilaalinta guud, qaababka go'aamada iyo cawaaqibyada isticmaalka iyo qiiqa tubaakada. Arrintan darteed, dhinacyadu waa in ay u midoobaan barnaamijyada dabagalka tubaakada ee heer qaran, heer gobol iyo dabagalka caafimaadka ee heer caalami, si macluumaadka la hayo la isu barbardhigo loona falanqeeyo, hadba sida ku habboon.

3. Dhinacyadu waxa ay aqoonsanayaan muhiimadda dhaqaale iyo midda farsamo ee heer qaran, gobol iyo heer caalamiba, iyadoo dhinac kastana uu ku dadaalayo:

(b) Dhisida nidaam heer qaran ah oo loogu talagalay dabagalka cudurrada faafa, kuwaas oo ka dhasha isticmaalka tubaakada ee la xiriiraarrimaha bulshada, dhaqaalaha iyo caafimaadka;

(t) Iskaashiga ururada heer qaran, gobol iyo heer caalami iyo hay'adaha kalesida; hay'adaha dowliga ah iyo kuwa aan dowliga aheyn ee ka shaqeeya dabagalka tubaakada iyo isdhaafsiga macluummaadka ku saabsan arrimaha ku xusan faqrada 3(b) ee qodobkan; iyo

(j) Iskaashiga Ururka Caafimaadka Adduunka si loo horumariyo guud ahaan tilmaamaha ama habraacyada lagu qeexayo ururinta, falanqaynta iyo faafinta xogaha dabagalka tubaakada.

4. Dhinacyadu waxa ay ku xirnaan doonanshuruucda qaranka, iyagoo dhiirigelinaya oo fududeynayaisweydaarsiga macluumaadka guud,farsamada, dhaqaale-bulsheedka, ganacsiga iyo sharciyada cilmiga ku salaysanee la heli karo, iyo sidoo kale macluumaadka ku saabsan waxsoosaarka iyo beerista tubaakada, sida ku xusan Cahdigan, kaas oo wax ka taraya baahiyaha gaarka ah ee waddamada soo koraya oo dhaqaalahooduna uu kala-guurka ku jiro.

Dhinac kastana waa in uu ku dadaalaa:

(b) In uu si horumarsan u dhiso oo u joogteeyo xog-ururinta sharciyada cusub iyoshuruucda xakameynta tubaakada iyo, macluumaadka ku saabsan hirgelinta culuunta Sharciga, iyo ka wada shaqaynta horumarinta barnaamijyada xakamaynta tubaakada heer gobol iyo heer caalamiba.

(t) In uu si horumarsan u dhiso oo u joogteeyo xog-ururinta barnamijyada dabagal heer caalami ah oo waafaqsan faqrada 3(b) ee qodobkan; iyo

(j) In uu Iskaashi la yeesho ururo caalami ah, si horumarsanna u dhiso oo u joogteeyo nidaam caalami ah si loo soo ururiyo loona faafiyo macluumaadka ku saabsan waxsoosaarka tubaakada, taas oo saameyn ku leh Cahdiga ama hawlaha caalamiga ah ee xakameynta tubaakada.

5. Dhinacyadu waa in ay wada shaqeeyaan, sida ururada caalamiga ah iyo kuwa gobolkaba iyo hay'adaha maaliyadeed iyo horumarineed, heerkii ay doonaanba ha ahaadeene, iydoo ladhiirigelinayo xogaha arrimaha farsamo iyo maaliyadeed, si loo kaabo qeybaha soo koraya ee waddanka iyo dhinacyada dhaqaalahoodu aanu sugneyn si ay u gutaan wajibaadkooda cilmibaariseed, dabagal iyo xog-isweydaarsi.

Qodobka 21aad

Warbixinta iyo Xog Isweydaarsiga

1. Xubin walba waxay shirweynaha saxiixayaasha usoo gudbineysaa, ayagoo soo marsiinaya Xafiiska Xoghayaha, warbixin xilliyeed ka hadleysa sidii ay u fuliyeen Cahdiga, warbixintaasoo ay ku jiraan arrimahan soo socda:

a) Xog ku saabsan arrimaha sharciyeynta, fulinta, maamulka iyo tallaabooyin kale oo la qaaday si loo hirgeliyo Cahdiga;

b) Xog ku saabsan caqabadaha ama dhibaatooyinkii la gala kulmay hirgelinta Cahdiga iyo tallaabooyinkii la qaaday si looga gudbo caqabadahaas;

c) Xog ku saabsan kaalmada maaliyadeed iyo midda farsamo ee la siiyay howlaha xakameynta tubaakada;

d) Xog ku saabsan sahan iyo cirmibaaris sida ku tilmaaman qodobka 20, iyo

e) Xogaha lagu tilmaamay qodobbada 6.3, 13.2, 13.3, 13.4(4) iyo 19.2.

2. Muddada u dhexeyneysa iyo qaabka ay yeelaneyso warbixinta ay qeybaha oo dhammi soo gudbinayaan waxaa lagu go'aaminayaa Shirweynaha Saxiisayaasha. Xubin kasta waxay warbixinta ugu horreysa ku keeneysaa laba sano gudahood laga billaabo maalintii uu dhaqan galay saxiixii Cahdiga ee Xubinta.

3. Shirweynaha saxiixayaashu, ayagoo raacaya qodobbada 22 iyo 26, waxay isla eegayaan qaabkii xubnaha soo koraya iyo kuwa dhaqaalahoodu kala guurka yahay, markii ay soo codsadaan, looga caawin iney kasoo baxaan waajibaadka qodabkan ka dhalanaya.

4. warbixinta iyo xog isweydaarsiga ku xusan Cahdigan waa iney waafaqsan yihiin sharciga dalka ee ku saabsan sirta iyo ammaanada. Qeybuhu waxay, sidii dhinacyadu ugu sheegeenba, dhowri doonaan xog kasta soo qarsoodi ah ee leys weydaarsado.

Qodobka 22aad

Ka wada shaqeynta Cilmiga, Teknoologiyada iyo dhinacyada sharciga iyo bixinta khibradda la xiriirta.

1. Qeybuhu waxay yeelanayaan iskaashi toos ah ama ay u dhexeeyaan hay'ado caalami ah oo awood u leh, si ay u xoojiyaan kartidooda ku aadan taabbagelinta waajibaadka ka dhashay Cahdigan, ayagoo ku xisaabtamaya baahida ay qabaan xubna dalalka soo koraya ama kuwa dhaqaalahoodu marayo heer kala guur ah. Iskaashiga noocaas ahi wuxu dhiirrigelinayaa isdhaafsiga farsamada, aqoonta iyo khibradda sharci iyi teknoolojiyo, sidii leysku wada raacay, si loo dejiyo, loona adkeeyo Istaraatiijiyad, qorshe iyo barnaamishyo qaran oo lagu xakameeyo tubaakada oo ku wajahan, arrimo kale ka sokow:

(b) Fududeynta horumarinta, isdhaafsiga iyo hanashada teknoolojiyada, aqoonta, xirfadaha, kartida iyo khibradda la xiriirta xakameynta tubaakada.

(t) Bixinta farsamo, aqoon, sharci iyo khibrado kale si loo dejiyo, loona xoojiyo istaraatiijiyad, qorshe iyo barnaamishyo qaran oo lagu xakameynayo tubaako, oo looga dan leeyahay in laa dhaqangeliyo Cahdiga, iyadoo, arrimha kale ka sokow:

(i) Laga caawinayo, codsigooda ka dib, sameynta aasaas ssharci dejineed iyo barnaamishyo farsamo, oo ay ku jiraan kuwa looga hortegayo kusoo biirista balwadda tubaakada, dhiirrigelinta joojinteeda iyo ka hortagga in tubaakada lagu cabbo goobaha dadweynaha.

(ii) Ka caawinta shaqaalaha tubaakada in ay helaan mihnado shaqo oo dhaqaale ahaan iyo sharci ahaanba looga maarmi karo howlihii tubaakada, oo ay quudkooda kasoo saaran karaan, iyo

(iii) Ka caawinta beeraleyda tubaakada iney tacabkooda u beddelaan dalagyo kale oo dhaqaale ahaan isbixin kara.

(j) In laga taageero tababarrada iyo mashaariic xirfad dhis ah oo loo qabanayo shaqaalaaha ku habboon, si waafaqsan qodobka 12.

(x) Bixinta qalabka, agabka iyo sahayda kale, sidoo kalana taakulo saad oo lagu bixxinayo istaraatiijiyadda, qorshaha iyo marnaamishyada xakameynta tubaakada.

(kh) Caddeynta qaababka xakameynta tubaakada, oo ay ku jirto daaweyn buuxda oo la siinayo dadka tubaakada (nicotine) qabatimay.

(d) Dhiirrigelinta cilmibaaris kor loogu qaadayo awoodda loo leeyahay in daaweyn buuxda loo helo dadka tubaakada (noctine) qabatimay.

2. Shirweynaha saxiixayaashu wuxuu dhiirrigelinaya oo fududeynayaa isweydaarssiga fasamada, cilmiga iyo khibradda sharci iyo tan teknoolojiyaded, ayadoo taakulo maalayadeedna loo diyaarinayo, sida uu qadobka 26.

QEEYBTA VIII: QAABABKA HAY'ADEED IYO KHEYRAADKA MAALIYADEED

Qodobka 23aad

Shirweynaha Saxiixayaasha

1. Shirweynaha saxiixaayaasha ayaa halkan lagu dhisayaa. Shirweynaha ugu horreeya waxaa isugu yeeraya Ururka Caafimaadka Adduunka WHO muddo aan ka badnayn hal sano gudaheed, laga billaabo maalintii uu dhaqangalay ku biiritaanka Cahdigu. Shirweynuhu wuxuu fadhigiisa ugu horreeya ku go'aamin doonaa goorta iyo goobta lagu qaban doono fadhiyadiisa dambe ee caadiga ah.

2. Fadhiyada aan caadiga heyn ee shirweynaha saxiixayaasha waxaa la qabanayaa markii kale ee Goluhu u arko in loo baahan ahay, ama ay codsi qoraal ah soo gudbiso xubin ka mid saxiixayaasha, oo shardigu yahay, in lix bilood ka hor ay xubintu codsigeeda usoo gudbisay Xafiista Xoghayaha Joogtada ah ee Cahdiga, isla markaana ay taageeraan seddax meelood oo meel ka mid xubnaha guud.

3. Shiweynaha saxiixayaashu wuxuu fadhigiisa ugu horreeya isfaham ah ugu meel marin doonaa xeerarka habraaciisa shaqo.

4. Shirweynaha saxiixayaashu wuxuu sidoo kale si isfaham ah ku meel marin doonaa xerarkiisa maaliyadeed iyo sidoo kale santuuqa dhaqaale ee maamulada ka farcami doona iyo weliba xeearka lagu maamulayo dhaqaalaha ku baxaya Xafiiska Xogheynta. Fadhi kasta oo caadi waxaa lagu ansaxin doonaa miisaaniyadda xilli maaliyadeedka soo socda tan iyo inta laga gaarayo fadhiga kale.

5, Shirweynaha saxiixayaasha wuxuu isha ku heyn doonaa hirgelinta Cahdiga, wuxuuna qaadan doonaa go'aamada lagama maarmaaka u ah in si wax ku ool ah loo hirgeliyo Cahdiga,wuxuuna kaloo ansaxin doonaa heshiisyada la socda, lifaaqyada iyo waxka bedelka lagu sameeyo Cahdigan, si waafaqsan qodobbada 28,29 iyo 33. Ujeeddadan darteed ayaa wuxuu shirweynuhu:

(b) Dhiirrigelin doonaa oo fududeyn doonaa is dhaafsiga xogaha, sida ku xusan qodobbada 20 iyo 21

(t) Dhiirrigelin doonaa oo hoggaamin doonaan dejinta iyo dibuhabeynta joogto oo lagu sameynayo habab isu dhigma oo cilmibariseed iyo xog ururineed oo ka dheeri ah tii lagu soo sheegay qodobka 20, kuna saabsan hirgelinta Cahdigan.

(j) Dheerrigelin doonaa, dejinta, hirgelinta iyo qiimeynta istaraatiijiyad, qorshe iyo mashaariic, sidoo kalana siyaasad, sharciyeyn iyo habab kaleba.

(x) Ka baaraandegi doonaa warbixinnada ay usoo gudbiyaan xubnuhu si waafaqsan qodobka 21, wuxuuna si joogto ah u meel marin doonaa warbixinnada ku saabsan hirgelinta Cahdiga.

(kh) Dhiirrigelin doonaa oo dhiirrigelin doonaa u abaabulidda kheyraadka maaliyadeed in lagu bixiyo hirgelinta cahdiga, si waafaqsan qodobka 26.

(d) Dhisayaa markii loo baahdo hay'ado farac ah oo gacan ka geysanaya gaarsita ujeeddooyinkii Cahdiga

(r) Codsanayaa , markii loo baahdo, adeegga iyo wadashaqeynta iyo xogta ay helaan hay'adaha Qaramada Midoobay ee awoodda u leh arintuna ay khuseyso, ururrada kale ee caalmiga ah iyo kuwa dowlad gobaleedyada iyo ururrada aan dowliga aheyn, taasoo looga dan leeyahay in lagu xoojiyo hirgelinta Cahdiga, iyo

(s) Ka fikirayaa tallaabooyin kale oo lagu gaari karo ujeeddooyinka cahdiga, iyadoo laga faa'iideysanyo khibraddii laga helay hirgelintiisii.

6 shirweynaha saxiixayaashu wuxuu habraac u sameynayaa qaabka ay goobjoogaal uga qeybgeli karaan kulamada Golaha.

Qodobka 24

Xafiiska Xoghayaha

1. Shirweynaha Saxiixayaashu wuxuu magacaabayaa xoghaye Joogto ah, wuxuuna dejinayaa waajibaadkiisa shaqo. Shirweynaha saxiixayaashu wuxuu ku dadaalayaa inuu arrintaas ku dhammeeyo fadhigiisa u horreeya

2. Ilaa iyo inta laga magacaabayo xoghayaha joogtada ah, waajibaadkiisana laga caddeynayo, waxaa shaqadii xafiiska Xoghayaha sii wadaya Ururka caafimaadka Adduunka (WHO)

3. Shaqada xafiiska Xoghayaha waxay noqon doontaa:

(b) Iney abaaulaan fadhiyada shirweynaha saxiixayaasha iyo hay'adaha ka farcama, siiyaanna adeegga ay uga baahan yihiin.

(t) In loo gudbiyo warbixinaha la helo iyadoo la raacayo heshiiska

(j) In la siiyo taageero dhinacyada gaar ahaan wadamada soo koraya iyo dhinacyada kujira marxalada kala guurka dhaqaalaha iyadoo la codsanaayo isku duwida iyo isgaarsiinta xogta loo baahan yahay iyadoo loo eegaayo qodobada heshiiska.

(x) In la diyaariyo warbixinaha iyo hawlaha la xiriira heshiiska iyadoo la raacayo hanaanka hagida shirka dhinacyada isla markaana loo gudbinaayo qaybaha ka qaybgalaaya shirka.

(kh) In la hubiyo hanaanka hagida shirka dhinacyada iyo isku xirnaanta muhiimka ah ee loo baahan yahay si loogu dabaqo shirarka caalamiga ah iyo kuwa ururdawladeedyada heer gobol iwm.

(d) In la guda gallo hanaanka hagidida shirka dhinacyada iyadoo la isku duba ridaayo nidaamka maamul ee loo bahaan yahay si looga mira dhaliyo shaqada shirka.

(r) In la qabto shaqooyinka maamul ee uu qeexayo heshiiska, oo ay ka midtahay baratakoolka iyo shaqooyinka kale ee lago'aamiyo in loo baahan yahay inta shirka dhinacyadu uu socdo.

Qoddobka 25aad

Xiriirka u dhaxeeya Dhinacyada Shirka iyo urudawladeedyada

Si loo helo wada shaqayn farsamo iyo mid dhaqaale oo lagu gaaro ujeedooyinka heshiiska xakameynta Tubaakada, Dhinacyada shirku waxa ay wadashayn ay ku meelmariyaan heshiiskan ka codsanayaan Ururada caalamiga ah iyo ururdawladeedyada oo ay ku jiraan Hay'addaha horumarinta dhaqaaluhu.

Qoddob ka 26aad

Dhaqaalaha

1. Dhinacyadu waxa ay aqoonsanyihiin muhiimada ay leedahay in Maaliyadda iyo in ay door muhiim ah ka ciyaarayso sidiii lagu gaari lahaa ujeedooyinka heshiiskan.
2. Dhinac waliba waa innuu bixiyaa taageero dhaqaale ama maaliyadeed isagoo ixtiraamaya hawlihiisa qaran ee loogu tallo galay in looga miradhaliyo ujeedooyinka shirka isagoo dhinacwaliga si gaar ah u eegaya qorshayaashiisa qaran, sida ay ahmiyadaha ukala siinayaan iyo barnaamijyadda la xiriira.
3. Dhinacyadu waa in ay ka qaybqaataan sidii lagu heli lahaa loogana faa'idaysan lahaa nidaamyo labageesood ah iyo kuwo isugu jira heshiisyo heergobol, heer gobol hoosaad iyo heshiisyo dhinacyo badan ba leh oo lagu maalgalinaayo horumarinta iyo xoojinta barnaamijkan dhinacyada badan ee lagu xakameynaayo Tubaakada si ay wadamada iyo dhinacyada ay khusaysaa horumar uga sameeyaan. Iyada oo la eegayo dhaqaalaha kasoo gala waxsoosaarka Tubaakada waa in la taageeraa sidii ay dadku ubeeran la haayeen dalagyo kala gedisan oo badal dhaqaale noqda si loo taageero Istiraatiijiyadda qaran ee Horumar waara.
4. Dhinacyadu waa wakiil heer Gobol, Caalami iyo xataa Urur dawladeedyadda ay dawladuhu ku bahoobaan sidaa awgeed waa in la dhiiri galiyaa Hay'adaha Maamulka iyo kuwa Horumarka ka shaqeeya si ay kaalmo dhaqaale usiiyaan dhinacyada wadamada soo koraaya iyo dhinacyada dhaqaalahoodu ku jiro marxalada kala guurka si ay kaalmo uga dhigtaan gudashada waajibaadkooda ka saaran Heshiiska Tubaakada iyada oo aan laga xadidin xaqa ka qaybgalkooga.
5. Dhinacyadu waxa ay ku heshiiyeen

   (a) In laga caawiyo dhinacyada gudashada waajibaadka ka saaran heshiiska, lana siiyo taageero dhanwalba ah sida mid maaliyadeed, farsamo iyo wixii la halmaala, Hawlaha xakameynta Tubaakada waa in la dardargaliyaa oo laga faaidaysaa siguud iyo si gaar ahaaneedba, gaar ahaana wadamada soo koraya iyo kuwa dhaqaaluhoodu kala guurka ku jiro (countries with economies in transition).

   (b) Xafiiska Maamulka ee jootada ahi waa inuu tallo siiyaa dhinacyada wadamada soo koryaay iyo kuwa uu dhaqaalahoodu kala guurka ku jiroba iyadoo la tix galinaayo codsiyadooda si looga taageero wixii loo heli karo ee u fududayn kara hirgelinta waajibaadka ku xusan heshiiskan Tubaakada.

(c) Kulllanka koowaad ee shirka waa in dhinacyadu ay dib u eegis ku sameeyaan waxyaabihii hore u jireya iyo hababka ku haboon ee taageero siin karta cilmibaarista ay sameeyaan xafiiska Maamulka joogtada ahi (Secretariat) iyo Xogaha kale ee la xiriira iyadoo la tixgalinayo isku filnaanshahooda.

(d) Natiijada dib u eegistani waa in lagu xisaabtamaa iyagoo ka qayb galayaasha shirku ay go'aaminayaan baahida loo qabo in la balaariyo hababka lagu aasaasi karo kaalmo dhaqaale oo caalami ah oo ku timaada si mutadawacnimo ah , ama hababkale oo dhaqaale loogu raadin karo iyadoo la tixgalinayo baahida loo qabo si loo hormariyo wakiilada wadamada si ay uga caawiso sidii ay u dabaqi lahaayeen ujeedooyinka laga leeyahay heshiiska xakameynta tubaakada.

QAYBTA IX: XALLINTA KHILAAFAADKA

Qodobka 27aad

Xallinta Khilaafaadka

1. Haddii ay dhacdo muran u dhaxeeya laba ama in ka badan oo ka mid ah dhinacyada uu khuseeyo khilaafkan ama murankan oo laxiiriira Fasiraada ama dabaqaada heshiiskan xakameynta tubaakada, dhinacyada waxaa la gudboon in ay raadiyaan dariiq diblomaasiyadeed oo ay ku xalinayaan khilaafaadka iyagoo ka heshiinaaya khilaafka amase waxa ay xal ku raadin karaan nidaamyo kale oo nabadeed oo ay iyagu doorteen, oo ay ku jirto isxilqaan, in dhexdhexaadiyo,

   Si loo heshiisiiyo. Guuldarada ka timaada in lagaadho heshiis ku yimaada is afgarad, dhexdhexaadin ama heshiisiinba ka madhigna in dhinacyadu ay ka doodaan masuuliyada ka saaran in ay raadiyaan dariiq ay ku xaliyaan kala aragti duwanaantooda.

2. Marka la ansixiyo, la aqbalo isla markaana loo meelmariyo si rasmi ah xaqiijinta hirgelinta heshiishka la ogalaaday. Intaa kadib wadan ama gobol ama hay'ad ka mida kuwa heshiiska qayb ka ahi waxa ay qoraal ku cadayn kartaa in muranka aan lagu xalin sida ku xusan baaragaraafka koowaad, In uu aqbalaayo oo ay khasab tahay in loo saaro guddi kumeel gaar ah oo dhexdhexaadin sameeya si waafaqsan nidaamka la iskula qaatay isfahamka loo dhan yahay ee qaybaha shirka.
3. Dhaqangalinta qodobkani waa inuu waafaqsanaadaa isla markaana xushmeeyaa baratakoolkasta oo kamida baratakoolada ka dhexeeya dhinacyada ama se u degsan.

QAYBTA X: HORUMARINTA HESHIISKA

Qodobka 28aad

Waxka badalka Heshiiskan

1. Dhinac kasta oo mida dhinacyada qaybta ka ah heshiisku waxa uu soo jeedin karaa in waxkabadal lagu sameeyo heshiiska waxaana tixgalin fiican la siinayaa inta uu socdo shirarka dhinacyada qaybta ka ah heshiiskani.

2. Waxka badalka lagu sameynaayo heshiiskan waa in ay dabaqaaan dhinacyada heshiisku, qoraalada ama waxkabadalka lagoo jeediyo ee ku saabsan heshiiskani waa in la gaarsiiyaa dhinacyada qaybta ka ah heshiiska iyadoo loo sii marksiinay xafiiska Maamulka ee Joogtada ah (The Secretariat) ugu yaraan lix bil kahor kulanka la filayo in la horgeeyo si waxlooga badallo. Xafiiskan Maamulka ee Joogtada ahi sidoo kale waa in ay gaarsiiyaan waxka badalka lasoo jeediyey saxeexayaasha heshiiska isla markaana xogta la geeyo goobta loogu tallo galay in lagu kaydiyo.
3. Dhinacyadu waa in ay sameeyaan dadaalkasta oo heshiis looga gaari karo iyadoo la isla ogolyahay waxka badalka lasoo jeediyey in lagu sameeyo heshiiska. Hadii dadaalada la isla ogolyahay ay yihiin kuwo laga cagajiidayo isla markaana aan laga gaarin wax heshiish ah, markaa waxkabadalku waxa uu maciin bidayaa in looqaado cod oo uu helo afarqaybood marka loo qaybiyo codeeyashaa saddexqaybood oo kamid ah (3/4) oo majoorati ah marka la eego codeeyayaasha xaadirka ah kulanka. Ujeedooyinka qodobkan dhinacyada xaadirka ah ee codaynaya waxa looga jeeddaa dhinacyada codeeyey ee ama haa ama maya ku codeeyey. Wixii isbal soo baxana waa in lagaarsiiyaa Xafiiska Maamulka jootada ah ee loo yaqaano (the secretariat) si ay u kaydiyaan una gaarsiiyaan dhinacyada oo dhan wixii la isla go'aansaday.
4. Waxkasta oo la isla aqbalo iyadoo la tixgalinayo waxka badalka waa in la kaydiyaa, isbadalkasta oo la sameeyo si waafaqsan baaragaraafka 3^{aad} waa in la hirgaliyaa amase la dabaqaa oo ay hirgaliyaan dhinacyada qaybta ka ah heshiisku muddo ku eg 90 beri kadib marka laqabto ee la kaydiyo dokumentiga kasoo ugu yaraan ay aqbaleen saddexdmeelood oow laba (2/3) aa ah qaybaha dhinacyada ka ah heshiiska.
5. Waa in la dabaqaa ama la hirgaliyaa wax ka beddelka lagu sameeyey heshiiska maalinta 90^{aad} ka dib maalinta ay u soo gudbiyaan wax ka beddelkii la sameeyey xubnuhu xafiiska maamulka joogta ah ee lagu kaydiyo xogta (The Secretariat office).

Qodobka 29aad

Hirgelinta iyo lifaaqa Waxka badalka Heshiiskan

1. Lifaaqa heshiiskani iyo waxka badalkiisa waa in lasoo jeediyaa, la hirgaliyaa iyadoo loo eegaayo habraaca ku xusan Qodobka 28^{aad} faqradiisa 4$^{aad.}$
2. Lifaaqa heshiiskan waa in uu falgal la sameeyaa heshiishka hadii aan sikawudan u dhigneyn ama u fasirnayn, tixraaca heshiiskani waxa ay lamid noqonaaya tixraaca lifaaqkasta oo lagu lifaaqo si waafaqsan nidaamka lifaaqyada loo sameeyo.
3. Lifaaqyadu waa in ay ku xadidnaadaan liiska sidoo kale foomamka ama waxayaabaha kale ee waxqeexayaa waa in ay waafaqaan habraaca cilmiga ah, tan farsamo iyo Maamul intaba.

Qaybta XI: Hirgelinta

Qodobka 30aad

Boos celinta Heshiiska

Wax boos celin ah laguma sameyn karo Heshiiskan

Qodobka 31aad

Ka bixitaanka

1. Wakhtikast laga bilaabo muddo labo sanno ah kadib laga bilaabo taariikhda heshiiska lagalay isla markaana la dhaqangaliyey dhinacii rabaa waa uu ka bixi karaa heshiiska isagoo qoraal ogeysiin ah usoo diraya xafiiska Maamulka joogtada ah (The Secreatriat/ the Depositary) ama halka lagu kaydiyey ee lagu hayo heshiiskan.
2. Dhinackasta oo raba innuu ka baxo heshiiskan waxa loo tixgalinayaa inuu ka baxay baratakool kasta oo uu qayb ka ahaa.

Qodobka 32aad

Xaqa Codeynta

1. Dhinac kasta oo kamid ah heshiiskani waxa uu leeyahay hal cod (One vote) Marka laga reebo waxa ku xusan baaragaraafka 2aad ee Qodobkan.
2. Ururada isdhexgalka dhaqaalaha, iyagoo isticmaalaya xirfadahooda waxa ay awood u leeyihiin in ay isticmaalaan xuquuq ah in ay leeyihiin tiro codayn ah oo u dhiganta tirada wadamada xubnaha ka ah ee qaybta ka ah heshiiskan xakameynta tubaakada. Waxaana xusid mudan in ururadani aanay isticmaali Karin hadii xubinkamid ahi ay gaarkeeda u codeyso codkeeda.ama sidan si kasoo horjeeda.

Qodobka 33aad

Baratakoolka

1. Dhinac kasta oo kamid ah dhinacyada heshiisku waxa ay soo jeedinkaraan baratakoolo, baratakoolkan oo uu shirku tixgalindoono.
2. Dhinacyada qaybta ka ah shirkani waxa ay ku dhaqmayaan baratakoolada ku xusan heshiiskan. Dabaqaada baratakooladan awgood waa in dadaalkasta la sameeyaa si loo gaaro heshiisguud oo loo dhanyahay.Haddii wax guud in la isku raaco laga cagajiido islamarkaana wax heshiis ah la gaari waayo, waa in ugu danbeyn baratakoolka ay ucodeeyaan afarmeelood oow saddex (3/4) oo ah cod aqlabiyad ah oo ay codaynayaan dhinacyada ka qaybgalaaya shirka. Ujeedooyinka qodobkan dhinacyada xaadirka ah

ee codaynaya waxa looga jeeddaa dhinacyada codeeyey ee ama haa ama maya ku codeeyey.

3. Qoraalka baratakoolkasta ee lasoo jeediyo waa in ay dhinacyadu ugudbiyaan Xafiiska Maamulka joogtada ah ee loo yaqaano (The Secretariat) ugu yaraan lix bilood kahor kulanka loo qorsheeyey in lagu lafaguro laguna dhaqan galiyo.
4. Kalya dhinacyada qaybta ka ah heshiiskan ayaa qayb ka ahaanaaya baratakoolka.
5. Baratakoolkasta oo kamid ah heshiiskani waxa uu qabanayaa kalya cida qaybta ka ah baratakoolkan hadii su aali ka timaadana waxa go'aan ka gaaraaya dhinacyada qaybta ka ah waa hadii su'aal gaar ahi ka timaado.
6. Baahida loo qabo hirgelinta baratakoolkan waxa lagu go'aaminayaa qorshayaasha shirka.

Qodobka 34aad

Saxiixa

Heshiiskani waxa uu u furan yahay in ay saxiixaan dhamaanba xubnaha qaybta ka ah Hay'adda Caafimaadka Aduunka ee Magaceeda loo soo gaabiyo WHO ee laakiin xubinta ka ah Ururka Qaramada Midoobey (UN) iyo ururgoboleedyada ka shaqeeya isdhexgalka dhaqaalaha wadamadooda ee ka tirshan Xarunta Ururka Caafimaadka Aduunka ee Geneefa laga bilaabo 16ka June, 2003 sidoo kale Xarunta Ururka Caafimaadka Aduunka ee Newyork laga bilaabo 30ka June, 2003 illaa 29ka June ee 2004ka.

Qodobka 35aad

Ansixinta, Aqbalaada iyo Xaqiijinta Rasmiga ah

1. Heshiiskani waxa u hogaansamaya, islamarkaana ansixin, aqbalaad ama ogolaanso ku sameynaaya dawladaha xubnaha ka ah iyagoo xaqiijinaya aqbalaada rasmiga ah ee heshiiska, waxa kale oo sidan oo kale samaynaya ururgoboleedyada ka shaqeeya iskaashiga iyo isdhexgalka dhaqaalaha waxaana u furan in ay xaqiijintan rasmiga ah sameeyeeyaan Maalin kadib marka taariikhda saxeexida heshiiska lasoo xiro, dhamaan dukumentiyada la ansixiyo, la qabalo islamarkaana xaqiijinta rasmiga ah lagu sameeyo waa in la dhigaa Xarunta kaydka ee loogu tallo galay.
2. Ururgoboleedkasta oo ku hawlan iskaashiga iyo isdhexgalka dhaqaalaha oo qaybka noqdo heshiiskan xakameynta tubaakada hadii aanay xubnaha wadamadiisu aanay qayb ka ahayn waxa ururka qabanaya waajibaadka ku xusan qodobada heshiiska, hadiise ay dhacdo in dalalka xubnaha ka ah ururgoboleedka in mid ama laba kamid ahi ay qaybka yihiin heshiiska ururgoboleedka iyo xubnihiisuba waxa ay go'aansandoonaan doorkooda mas'uuliyadeed ee kasaaran xilgudashada qodobada ku xusan heshiiska. Xaaladahan oo kale ururgoboleedka iyo wadamada xubnaha ka ahi

xaq umalahan in ay adeegsadaan xuquuqda ku xusan heshiiskan is aan sharciga waafaqsanayn.

3. Uurgoboleedyada ka shaqeeya iskaashiga iyo isdhexgalka dhaqaalaha, waa in ay hirgaliyaan islamarkaana xaqiijiyaan aqbalaada rasmiga ah iyagoo ixtiraamaya qodobada heshiiska waana in ay wargaliyaan xarunta loogu tallo galay in lagu kaydiyo heshiiskan. Xaruntan oo markeeda ogeysiinaysa iyaga wixii isbadalo ah ee ku yimaada heshiiskan iyo xogaha la xiiiraraba la wadaagi doona.

Qodobka 36aad

Dhaqan galinta Sharciga

1. Heshiiskan waa in la hirgaliyaa maalinta shagaashanaad kadib marka la ansixiyo, la isla aqbalo ee si rasmi ah la isula xaqiijo loona gudbiyo xarunta keydinta (QM).
2. Wadankasta oo Ansixiya isla markaana aqbala heshiiskan ee saxeexa kadib marka uu ku qanco qodobka koowaad ee heshiiskan waa in uu dhaqan galiyaa heshiiska maalinta shagaashanaad kadib marka la ansixiyo, la isla aqbalo ee si rasmi ah la isula xaqiijo loona gudbiyo xarunta keydinta.
3. Ururgoboleedyada ka shaqeeya isdhexgalka dhaqaaluhu waa in ay Heshiiskan dhaqan galiyaan kadib marka ay si rasmi ah u aqbalaan, malinta shagaashanaad ee ugu dambeysa kadib marka uu heshiiska habraaciisa rasmiga ahi uu dhameystirmo.
4. Ujeedada qoddobkan, Wixii wax ku dar ah ee ay soo dhigaan ururgoboleedyada ka shaqeeya isdhexgalka dhaqaalaha looma Xisaabinaayo in ay tahay wax ku dar ay sameeyeen wadamada xubnaha ka ah ururgoboleedkaasi

Qodobka 37aad

Kaydinta

Xoghayah guud ee Qaramada midoobay ayaa ahaanaaya kaydiyaha Heshiiskan iyo wixii waxkabadal iyo kaabis ah ee lagu sameeyo, Baratakoolada iyo lifaaqyada iyadoo loo eegaayo Qoddobada28^{aad,} 29^{aad} iyo 33$^{aad.}$

Qodobka 38aad

Qoraalka dhabta ah

Qoraalka Asalka ah ee heshiiskani oo ku qoran luuqadaha Carabiga, Afka shiinaha (Chines), Ingiriisiga, Faransiiska, Ruushka iyo isbaanishkuba waa qoraalo rasmi ah waana inuu kaydiyo Xoghayaha guud ee Jimciyada Quruumaha ka dhaxaysa.

Waa inuu Markhaati ka ahaado saxiixa, iyo habraaca saxda ah ee loo raacay saxeexida heshiiska.

Waxa lagu saxiixay Geneve Maalintii kow iyo labaatanaad ee Bisha May, Labakun iyo Saddexda.

Lifaaqa 1: WHA 56.1 Cahdiga WHO ee Xakameynta Tubaakada.

Fadhiga konton iyo lixaad ee Golaha Guud ee caafimaadka Adduunka (WHA) wuxuu:

Iasagoo xasuusan qaraarkii WHA 49.17 iyo WHA 52.18 oo ku baaqayay in la sameeyo hannaanka cahdiga WHO ee xakameynta tubaakada, ayadoo la waafijinayo qodobka 19 ee sharciga WHO;

Isagoo ay ka go'an tahay inuu jiilalka hadda iyo kuwa mustaqbalkaba ka ilaaliyo isticmaalka tubaakada iyo waxyaalada qiiceeda oo lagu daayo hawada;

Isagoo si qotodheer uga wallaacsan sida dardarta leh ee ay dunida ugu soo kordheyso cabista iyo isticmaalka kale ee tubaakada;

Isagoo si weyn usoo dhoweynaya, una bogaadinaya warbixintii guddoonka guddiga Wadahadashiinta dowladaha oo ah mirahii kasoo baxay shaqadi Gudiga Wadahadashiinta Dowladdaha[(1)].

Isagoo ku kalsoon in cahdigani yahay tallaabo jid fur u ah iskaashi ay hay'adaha heer qaran, heer gobal, iyo kuwa heer caalamiba ka yeeshaan ka ilaalinta dadka dhibaatooyinka badan ee ay u geysanayaan isticmaalka tubaakada iyo qiiceeda oo hawada lagu sii daayo iyo isagoo maanka ku haya in loo baahan yahay in ilgaar ah lagu eego xaaladda dalalka soo koraya iyo kuwa dhaqaalahoodu hooseeyaba.

Isagoo adkeynaya baahida loo qabo in si dhaqso ah loo meelmariyo cahdiga, loona dhaqangeliyo Cahdiga,

1. Wuxuu ansaxinayaa Cahdiga ku lifaaqan qaraarkan;
2. Wuxuu si waafaqsan qodobka 34 ee cahdigan oqeysiis ku bixanayaa in saxiixa Cahdigu ka furmi doono Xarunta Who ee Geneva laga billaabo 16-ka Juun ilaa 22-ka Juune, 2003, markaas ka dibna la geyn doono Xarunta Qaramada MIdoobay ee New York, halkaaso saxiixiddiisu ka socon doonto laga billaabo 0-ka Juun, 2003 ilaa 29-ka Juun, 2004.
3. Wuxuu ugu baaqayaa dhammaan dalalka iyo hay'adaha isu furka dhaqaale Gobaleedka ee awoodda u lih iney saxiixaan, ansaxiyaan, aqbalaan oo qaataan, ayagoo si rasmi ah u xaqiijinaya ama u oggolaanaya iney Cahdiga qaateen. Wuxuu kaloo Goluhu ku baaqayaa in sida ugu dhaqsiyaha badan hirgeliyo Cahdiga.

[1] Documiintiga A56/inf.doc./7rev.1

4. Wuxuu ku boorrinayaa dalalka xubnaha ah iyo hay'adaha isu furka dhaqaale Gobaledka, kuwaas oo sugaya sharcinimada buuxda ee xubinnimadoodu iney qaadaan tallaabooyin lagu dhimayo isticmaalka tubaakada iyo ku cabisteeda goobaha dadweynaha.

5. Wuxuu ku boorrinayaa dalalka xubnaha ah, hay'adaha isu furka dhaqaale gobaleedka, goob joogayaasha iyo ciddii kaloo daneyneysaba iney gacan siiyaan howlaha diyaargarowga sida ku cad qaraarkan, si firfircoonna u dhiirrigeliyaan kusoo biirista iyo dhaqangelinta cahdiga.

6. Wuxuu ugu baaqayaa Qaramada Midoobay iyo ururrada caalamiga ah ee ay khuseyso iney joogteyaan bixinta kaalmada dhaqaale ee lagu xoojinaya barnaamishyada xakameynta tubaakada ee heer qaran iyo heer caalamiba leh.

7. Wuxuu go'aansaday inuu si waafaqsan her 42 ee xeerraka habraaca Golaha Guud ee caafimaadka Adduunka u dhiso guddi howleedyo oo dhan yahay, kuwaasoo ay kasoo qeybgeli karaan dhammaan dalalka iyo hay'adaha isu furka dhaqaale gobaleedha sida uu qabo qodobka 34 ee cahdigan si looga fekero loona diyaariyo soojeedinno ku saabsan arrimaha cahdigu tlmaamay, si shirweynaha xiga ee saxiixayaasha loogu falanqeeyo, looguna ansaxiyo., arrimahaas waxaa ka mid noqon kara:

(1) xeerarka habraaca shirweynaha saxiixayaasha (qodobka 23.3), oo ay ka mid tahay sameynta shuruudaha ka qeybgalka qoobjoogayaashu ee shirweynaha Saxiixayaasha (qodobka 23.6)

(2) shardiga xulashada shaqaalaha xafiiska xoghayaha iyo dejinta waajibaadkoodaaa shaqo (qodobka24.1).

(3) xeerarka maaliyadeed ee shirweynaha saxiixayaasha iyo maamulada ka farcama iyo bixinta kharashka lagu socodsiinayo howlaha xafiiska xaghayaha (qodobka 24.4).

(4) qabyaqoraalka miisaaniyadda xilli maaliyadeedka koowaad (qodobka 23.4)

(5) dibu eegista kheyraadka la heysto ee waxtarka leh iyo qaabka loo caawinayo xubnaha si ay uga soo dhalaalaan waajibaadka cahdigani saarayo.

8. Wuxuu kaloo ogaansanayaa inuu guddi howleedka dowladaha badan ka koobani dib eegis ku sii sameeyo diyaargarowga loo gelayo fadhiga shirweynaha saxiixayaasha, warbixinta uu isla iyaga toos ugu gudbiyo .

9. Inuu xal ka gaaro go'aamada ay ka qaateen guddiga wadahadashiinta dowladuhu arrimaha la xiriira Cahdiga WHO ee xakameynta Tubaakada ee khuseeya ururrada aan dowliga aheyn ay waafaqsanaan doonaan shaqadii guddi howleedka dowladda.

10 Ka codsanayaa Agaasimaha Guud:

(1) Inuu shaqada xafiiska Xoghayaha hoos keeno Cahdiga ilaa iyo inta laga magacaabayo magacaabayo Xoghaye Joogto ah, lagana howgelinayo Xafiiskiisa.

(2) Nuu qaado tallaabooyinka ku habboon ssi loo caawiyo dalalka soo koraya ee xubnaha ah iyo kuwa dhaqaalahoodu kala guurka ku jiro, ee loogu suurageliyo iney dhaqangeliyaan CAhdiga.

(3) Inuu si kalgal ah u socodsiiyo shaqada guddi howleedyada dowladaha laga billaabo 16-ka Juun, 2003 ilaa fadhiga xiga ee Shirweynaha saxiixayaasha.

(4) Iney si joogto ah u hubiyo in hay'adda Who ay door mug leh ka qaadaneyso bixinta talooyin farsamo, tilmaamo iyo taageraba howlaha caalamiga ah ee xakameynta tubaakada.

(5) Inuu Golaha Guud ee caafimaadka Adduunka si joogta ugu wargeliyo horumarka laga sameynayo dhaqangelinta Cahdiga iyo

diyaargarowyaada kale ee socda.

Lifaaqa 2: Heerarkii Uu Soo Maray Caqdiga Xakameynta Tubaakada Ee WHO.

Ra'yiga ah in tubaakada loo sameeyo nidaam caalami ah wuxuu la billawday ansaxintii qaraarkii 48-ad ee WHA, 1995, kaas oo Agaasimaha Guud ka dalbanayay inuu Fadhiga 49-ad ee Golaha loo dhan yahay ee Caafimaadka Adduunka warbixin ka siiyo suuragalnimada nidaam caalami ah, sida habraacyo, baaqyo iyo cahdiyo caalami ah oo tubaakada lagu xakameeyo.

Ayadoo daba socota natiijadii qaraarkii WHA 48.11, kaas WHO looga codsaday iney qabyo-qoraal ka sameyso daraasad suraagalnimo, tasoo Agaasimaha Guud uu kasoo jeediyay fadhigii Guddiga Joogtada ah ee WHO ("suuragalnimada Nidaam Caalami ah oo Lagu Xakameeyo Tubaakada" (EB97/INF DOC 4). Intuu fadhigu socday Guddiga Fulintu waxay aansaxiyeen Qaraarka EB 97 R8, "Cahdiga Caalamiga ah Ee xaakameynta Tubaakaada"

Isla sanadkaas daabayaaqadiisii, Golaha loo dhan yahay ee Caafimaadka Adduunku waxay ansaxiyeen Qaraarka WHA 49.17, "Nidaam Caalami ah oo Lagu Xakameeyo Tubaakada", kaasoo Agaasimaaha Guud looga dalbaday inuu hindiso saameynta Jaangooyada Cahdi lagu Xaakameynayo Tubaakada. Ayadoo ka dhalatay natiijadii qaraarkaan, waxaa markii ugu horreysay la howl geliyay hey'addii heshiis- gelidda ee WHO yeelaato.

Sanadkii 1998, agaasimihii Guud ee who oo uun markaa la doortay, Dr. Gro Harlen Brunddand wuxuu muhimadda koowaad ka dhigtay xakameynta tubaakada, isagoo dejiyay mashruuc heer wasiir ah, Hinsida Tubaako la'aanta, si dareenka, kheyraadka iyo wax qabadka caalamka loogu soo duwo fiditaanka Tubaakada ee dunida. Iskaashi dhinacyo badan leh oo muujinaya qaabka howsha loo qabanayo ayaa la sameeyay. Si kasii muhiimsan, Mr. Brundtland wuxuu xubnaha Saxiixayaasha kala shaqeeyay in la xaqiijiyo in sharciyad loo helo CAhdiga Xakameynta Tubaakada, loogana howlgalo sidii dadka loo abuubuli lahaa, taageero siyaasadeedna loogu raadin lahaa shuruucda xakameynta Tubaakada.

Bishii Mey, 1999, kalfadhigii 50-ad ee Golaha Loo dhan yahay ee Caafimaadka Adduunku wuxuu dhabbaha u xaaray wada hadallo ay dalal badani ka qeybgaleen oo looga hadlayay Cahdiga WHO ee Xakameynta Tubaakada Iyo heshiisyada la socda. Qaraarkii WHA 52.18, waxa lagu dhisay laba guddi oo loo xilsaaray qabyaqoraal ka sameeyaan jaangooyada Cahdiga, dhameystirka wadahadallada iyo iney qoraalkooda usoo gudbiyaan fadhiga konton iyo shanaad ee Golaha Loo Dhan yahay ee Caafimaadka Adduunka si loo qiimeeyo. Labada Guddi waxaa ka mid ah guddi howled farsamo oo soo diyaarinaya waxyaabaha uu ka koobnaanayo qabyaqoraalka soo jeedin ah ee ka hadlaya qaabka Cahdigu iyo guddi kale oo ka shaqeeynaya wadahadallada dowladaha dhexmaraya si ay qabyaqoraal uga sameeyaan, ugana wada hadlaan jaangooyada Cahdiga

soo jeedinta ah iyo heshiisyada la xiriira. Labada Guddiba kusoo biiriddoodu wey u furan tahay dhamman dalalka xubnaha ka ah Cahdiga iyo Dowlad Gobaleedyada isu furka dhaqaalaha, kuwaas oo dalalkoodu siiyeen awood ay uga qeybgalaan Howlaha xakameynta tubaakada.

Labada Guddi Howleed waxay laba faddhi ku yeesheen Geneva (25-29 Oktoobar 1999 iyo 27-29 Maarso 2000). Waxaa kasoo baxay dukumiinti leh qoraal hordhac oo ka kooban waxyaabaha ku jira qabyaqoraalka soo jeedinta ah ee jaangooyaada Cahdiga. Cahddiga oo ay wehliso soo jeedintii guddi howleedka yaa loo gudbiyay fadhiga konton iyo sedaxaad ee Golaha loo dhan yahay caafimaadka Adduunka. Qaraarka WHA 53.16 dhexdiisa, wuxuu Golaha Loo dhan yahay ee Caafimaaddku ugu baaqay Guddiga wadahadallada dowladuhu inuu billaabo wadahadallo diiradda lagu saarayo qabyaqoraalka jaangooyada Cahdiga, ayadoo aan waxba loo dhimeyn wadahadallada mustaqbalka laga jeelan karo heshiisyada la xiriira Cahdiga, si fadhiga konton afaraad ee Glaha loo ddhan yahay ee caafimaad warbixn looga siiyo horumarka lagu talaabsaday iyo laga baaraandego arrinta ah in ka qeybgal dheeraad ah oo goobjoognimo loo oggolaado hay'adaha aan dowliga aheyn (NGOs).

Fadhigii koowaad ee Guddiga wadahadashiinta Dowladaha (Geneva 16 – 21 Oktoobar 2000) waxaa ka hooreeyay doodo dadweyne oo looga hadlay arrimaha khuseeya caahdiga. Agaasimaha Guud ayaa doodaan qabanqaabiyaya si loo helo madal ay ku kulmaan howlwadeenada caafimaadka, ganacsada tubaakda iyo kooxaha beeraleyda si ay usoo gudbiyaan aragtidooda. Cajalado laga duubay doodahaas ayaa la siiyay Guddiga wadahadashinta, waxaa kaloo la dhigay websaaytka WHO, si dadweynuhu ugala socdaan.

Fadhigii kowaadba waa guddoomiye loogu doortay safiir Celso Amorim oo brazil ka socda, waxaa na dhisay gole ay ku jiraan guddomiye ku xigeenno ka kala socda Australia, India, jamhuuriyadda Islaamiga Iran, Koonfur Africa, Turkiga iyo Mareykanka. Qoraalka hordhaca ah eek u saabsan waxyaabaha ku jira qabyaqoraalka soo jeedinta ee Cahdiga WHO ee xakameynta tubaakada, kaasoo ay soo diyaariyaan guddi howleedka ayaa loo aqoonsaday inuu aasaas wanaagsan u yahay hindisaha wadahadalka. Markaas ka dibna safiir Amorim ayaa diyaariyay qoraalkii guddoonk ee Cahdiga xakameynta tubaakada. Qabyaqoraalkani wuxuu soo baxay bishii Jannaayo 2001 si saldhig ugu noqdo wadahadallada lagu yeelan doono fadhiga labaad.

Warbixin ku saabsan sidii ururrada aan dowliga aheyn looga soo qeybgelin lahaa howlaha guddiga wadahadashiinta ayaa laga soo jeediyay fadhigii 107-ad ee Guddiga fulinta ee dhacay Jannaayo, 2001. Si waafaqsan sida uu qabo go'aankii Guddiga fulinta ee EB107(2), Guddomiyaha Guddiga oo la shaqeynaya Guddoomiyaha Guddiga joogtada ah ee ururrada aan dowliga aheyn, wuxuu laba urur oo aan dowli aheyn u oggolaadaay

iney si rasmi ah xiriir ula yeshaan WHO, laga billaabo 26-ka Abriil, 2001. Labadaas urur waxay kala yihiin Isbaaheysiga la Dagaalnka Tubaakada ee Ururrada Caalamiga ah ee aan Dowliga aheyn Iyo Hay'adda Infact.

Si diyaargaarow dheeraad ah loogu yeesho fadhiga labaad ee Guddiga Wadahadashiinta, waxaa wadatashi Gobaleed dhinacyo badan leh la isugu yeeray goballada iyo qeybgobaleedyada intooda badan. Wadatashiyo gobaleed iyo qeybgobeel kale oo dhinacyo badan leh ayaa la qabtay, kuwaas oo loogu diyargaroobaay hadba fadhiga xiga ee Guddiga Wadahadashiinta.

Fadhigii labaad ee Guddiga Wadahashiinta (Gneva, 30 Abriil – 5 Meey) ayaa mas'uuliyadda ka baraandegga waxyabaaha ku dhigan qabyaqoraalka hordhaca ah waxaa loo qeybiyay seddax guddi howled. Qqoraalka ugu weyn weyni wuxuu ka kooban yahay seddax warqadood oo soo baxay seddax la-guddomiye, kuwaas oo ah diiwaanka qoraaladii soo jeedinta ahaa ee la keenaay fadhiga oo lagu kabay qoraalkii asalka ahaa ee guddoonka. Waraaqo howleedyadaana ayaa noqday qabyaqoraal xilliyeedka Cahdiga.

Fadhiga seddaxaad (Geneva 22 – 28 Nofeembar 2001), laba guddi howled ayaa waxay soo saareen qormo dibuhabeyn lagu sameeyay, Guddi Howleedka koowaadna wuxxuu isna qabyo qoray qormo. Dukumiintiyadaas ayaa loo ismaalay wadahadalladii dheeraadka ahaa e dhacay fadhigii afaraad.

Maadaama uu ahaa wakiilkii joogtada aaha ee geneva u fadhiyay dalka brazil oo lagu beddelaay safiir Amorin, safiir Seixes Correa ayaa loo doortay Guddoomiyaha Guddiga wadahadashiinta Dowladaha ee Cahdiga WHO ee Xakameynta Tubaakada, intii uu socday kalfadhigii afaraad (Geneva, 18 – 23 2002).

Waxaa leysku afgartaay in safiir Seixas Carrea ay tahay inuu soo diyaariyo qoraalka cusub ee guddoonka, kaas oo aasaas u noqon doona wadahadallada kal fadhigaa shanaad ee Guuddiga Wadahadashiinta (14 -25 Oktoobar 2002). Qoraalku wuxuu soo baxay bishii Juulaay 2002. Shir farsamo oo caalami ah oo ay dowladdu Marekanku martigelineyso ayaa ka dhacay Xarunta Qaramada Midoobay ee New York (30 Juulaay – 1 Agoosto 2002). Shirka waxaa looga hadlaayay ka ganacsiga sharci darrada ah ee baadeecadaha tubaakada.

Afartii fadhi ee ugu horreysay Guddiga wadahadashiintu wuxuu ka baaraandegayay kala xulashada qoraal badan oo lasoo hordhigay. wadatashiyo xeeldheer oo la galay shirkii shanaad ayaa lagu soo koobay kala xulashadii qoraallada, taasoo sababtay wadahadallo mug weyn oo ku xigsaday. Aqrintii koowaadba, guddigiiyoo wada jira, ayaa qoraalladii Guddoomiyaha waxaa laga soo calaameeyay lix arrimood, kuwaas oo si aan rasmi ahayn loogu falanqeeyaay shir furan. Lixda arrimood waxay kala ahaayeen: xayeysiinta, dhiirrigelinta, wakiilnimada; kheyraadka maaliyadeed;ka ganacsiga sharri darrada ah

badeecada tubaakada; isla xisaabtanka iyo cawilcelinta; baakadaynta iyo summadeynta iyo ganacsiga iyo caafimaadka. Kooxo kale oo si aan rasmi aheyn si abaabulay ayaa qabtay dodo ku saabsan arrimaha sharciga, hey'adaha iyo habraaca iyo adeegsiga erayada. Horumar muuqda ayaa laaaga sameeyay wadahadallada iyo arrimo bandanna waa leysku afgaratay. Ayadoo ku saleysan mirihii kasoo baxay fadhiyo aan rasmi aheyn iyo latashiyo dhinacyo badan taabanayay oo lala yeeshaay wafuud iyo kooxo kala duwan, safiir Seixas Correa wuxuu 15-kii Jannaayo 2003 soo saaray qoraalkii guddoonka ee cahdiga xakameynta Tubaakada oo dibuhaabeyn lagu sameeyay.

Fadhigii lixaad iyo kii ugu dambeeyay ee Guddiga wadahadalsiintu wuxuu dhacay intii u dhaxaysay 17-kii Febaraayo ilaa 1-dii maarso 2003. Wadahadalladu waxay ahaayeen kuwo adag oo meelo baadan taabanayay. labada arrimood ee muhiimka ah ee xayeysiinta, dhiirrigelinta iyo waakiilnimada iyo kheyraadka maaliyadeed ayaa si aan rasmi aheyn waxaa looga dooday laba kulan oo kala duwan. Fahdigii guud ee ugu dambeeyay Guddiga wadahadalsiintu wuxuu oggolaaday in qoraalka loo gudbiyo fadhiga sshan iyo kontonaad ee Golaha Loo dhan yahay ee Caafimaadka Adduunka si looga baaraandego loogu ansaxiyo si waafaqsan qodobka 19-ad ee Dastuurka. Waxaa kaloo leysku raacay in doodad heshiiisyada la xiriira dib loo dhigi ilaa iyo inta Golaha Caafimaadku uu uga helayo waqti fulin oo uu uga baarandego arrinta. Kulankoodii ugu dambeeyay, Guddiga Wadahadashiintu waxay oggolaadeen in guddoomiya Guddiga wadahadashiintu uu qoro qaraar Golaha Loo Dhan yahay Ee caafimaadka Adduunka ka dalbanaya iney ansaxiyaan Cahdiga WHO ee xakameynta Tubaakada. Qabyaqoraalki ugu dambeeyay ee Cahdiga WHO ee Xakameynta Tubaakada waxaa loo gudbiyay Golaha Guud ee Caafimaadka si looga baaraandego, loona meel mariyo, ayadoo la raacayo Qaraarkii WHA 52.18.

26-kii Meey, 2003, Golaha Guud ee Caafimaadka Adduunku, wuxuu cod mid ah ku ansaxiyay Cahdigii WHO Ee Xakameynta TUbaakada. Cahdigu wuxuu u furnaa in la saxiix muddo hal sano ah, taasoo aheyd laaga soo billaabo 16-kii Juun 2002 ilaa 22-kii June 2003, wuxuuna saxiixu ka dhacayay Harunta WHO ee Geneva markii dambana waxaa laga furay XArunta Qaramada Midoobay ee New York, 30-kii Juun, 2003 ilaa 29 Juun 2004.

Cahdiga WHO ee Xakameynta Tubaakadu waa astaanta mustaqbalka caafimaadka adduunka, wuuna saameyn ku leeyahay ujeeddooyinka caafimaad Ee Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO). Soo gunaanadkii nidaamkii geeddi socodkii wadahadallada iyo wadajir u ansaxintii Cahdigii WHO ee Xakameynta Tubaakada, oo si buuxda u waafaqsan qaraaradii Golaha Guud Ee Caafimaadku, waxay bartilmaameed u tahay dhiirrigelin ta caafimaadka Dadweynaha, waxayna dhalineysaa in qaabab cusub oo sharci loo helo iskaashiga caalamka ee dhanka caafimaadka.

1.Dukumiint A53/12

2 Dukumiinti A/FCT/INB 1/2

3. Dukumiinti A/FCT/INB 2/2

4. Dukumiinti EB107/19

5. Dukumiinti A/FCT/INB 2/6 add. 1

6. Qabyaqoraalka qaraarkani wuxuu ku jiraa dukumiintiga A56/8/REF. 1

7. Eeg dukumiintiga A56/8 Lifaaq.

8 Dukumiintiga WHO WHA56.1

Cahdiga WHO Ee Xakameynta Tubaakada waxaa la sameeyay ayagoo laga jawaabayo faafitaankii tubaakada ee adduunyada ku baahayay. Faafidda isticmaalka tubaakada waxaa fududeeay arrimo badan oo is-huwan oo leh saameyn xuduudaha tallowsan, oo ay ka mid yihiin madaxbannaanida ganacsiga, maalgashiga tooska ah dibadda iyo arrimo kale sida suuqgeynta caalamiga ah, xayeysiinta, dhiirrigelinta iyo wakiilnimda dalalka isaga gudbta iyo dhaqdhaqaaqa caalamiga ah sigaarka suuqa madow iyo qarsoodiga ah looga ganacsado. Cahdiga WHO ee Xakameynta Tubaakadu waa heshiis ku saleysan caddeymo cilmi ah, kaas oo xaqiijinaya xaqa ay dadka oo dhammi u leeyihin iney ku noolaadaan heerka ugu sarreeya ee caafimaad.